HERITAGE INSTITUTE

# Dib-u-dhiska Nidaamkii Caddaaladda Soomaaliya ee Burburay

## Hagaajinta Siyaasadda, Qorsheyaasha iyo Nidaamyada



Jannaayo 2021

# Tusmada


**1. Nuxurka Daraasadda** **4**

**2. Habraaca Daraasadda** **5**

**3. Hordhac iyo dulucda taariikheed** **5**

3.1 Nidamkii Garsoorka ee ka danbeeyey (1960—1962) 6
3.2 Isbeddelkii koowaad ee garsoorka (1962-1969) 6
3.3 Askariyeyntii nidaamka Garsoorka (1969-1991) 8
3.4 Dagaalkii sokeeye kadib (1991-2000) 8
3.5. Dib-U-Eegista Nidaamka Garsoorka (2000-2009) 9

**4. Dib-U Dhiska Nidaamka Garsoorka** **11**

4.1. Kala dirista Golaha kumeelgaarka ah ee Adeegga Garsoorka 11
4.2 Shirka Dib u Habaynta Caddaaladda 12
4.3 Dib u habeynta awoodda Garsoorka 12

**5. Madmadowga Qaab-dhismeedka Sharciga** **15**

5.1 Aasaasidda maxkamadda Dastuuriga ah 16
5.2 Badashadashuruucda 17
5.3. Kala go'a mareegta caddaaladda 17

**6. Federaalaynta nidaamka caddaaladda** **18**

6.1. Waa noocma Hannaanka Garsoorka ee ku habboon Soomaaliya? 19
6.2 Heshiiskii Jawhar 20

**7. Madax-bannaanida nidaamka Caddaaladda** **21**

7.1 Mushaharka aan ku fillayn 22
7.2. Ilaalo la'aanta 23
7.3 Maqnaanshaha awoodda fulinta 23

**8. Musuqmaasuqa iyo maamul xumada** **24**

8.1 Maxakamadaha Al-Shabaab 25

**9. Nidaamka Garsoorka Xeer-dhaqameedka** **25**

9.1 Xarunta Nidaamka Xeer-dhaqameedka ee xallinta Khilaafaadka 26

**10. Gunaanad** **28**

**11. Talo bixin** **28**

# 1. Nuxurka Daraasadda

> *In ka badan 10 sano oo aanu jirin nidaam garsoor (1990-2000) oo ay ku xigtay 20 sano oo ay hawlgalayeen maxakamado fadhiid ahi (2000-2020), ayaa saameyn ba'an ku yeelatay laanta garsoorka ee guud ahaan dalka ka jirta*

Inkasta oo dhawaan dibuhabayn lagu sameeyey nidaamka rasmiga ah ee garsoorka Soomaaliya, haddana waa mid adhaxda ka jabay, kaas oo gabay in ay caddaaladda u sinnaadaan malaayiin muwaadiniin. In ka badan 10 sano oo aanu jirin nidaam garsoor (1990-2000) oo ay ku xigtay 20 sano oo ay hawlgalayeen maxakamado fadhiid ahi (2000-2020), ayaa saameyn ba'an ku yeelatay laanta garsoorka ee guud ahaan dalka ka jirta. Taasi waxa ay abuurtay in nidaamyo kale oo garsoor iyo kuwo xalinta khilaafaadka ahi ka abuurmaan dalka oo dhan, iyada oo ay muwaadiniintu ka helayaan natiijooyin wanaagsan. Tan waxa sii weheliyay loollan qotodheer oo ku saabsan fasiraadda dastuurka kumeelgaarka ah iyo qaabka madmadowga leh ee lagu dhisayo labada hay'adood ee ugu muhiimsan garsoorka: Golaha Adeegga Garsoorka (GAG) iyo Maxakamadda Dastuuriga ah ee Soomaaliya (MDS). Wali golaha Baarlamaanku si rasmi ah uma uu fedderaalaynin laanta garsoorka, sida uu dhigayo dastuurka kumeelgaarka ahi.

Isaga oo ka faa'iideysanaya xaaladdan, ayaa uu maamulka hadda jira ee Madaxweyne Maxamed Cabdullaahi Farmaajo, waxa uu si degdeg ah u meelmariyay xubno ka mid ah Golaha Adeegga Garsoorka, isaga oo adeegsanaya sii hayeyaasha golaha wasiirrada iyo baarlamaanka curyaanka ah, waxaana dhici karta in uu dhisayo Maxakamadda Dastuuriga ah ee Soomaaliya todobaadyada soo socda. In kasta oo ay xukuumaddani ku dhowaad afar sano haysatay awood badan oo aan la iska hortaagin in ay dhisto hay'adahaas muhiimka ah, haddana daqiiqadihii ugu danbeeyey dadaalkeeda waxa ay shaki galinayaan dhexdhexaadnimada laanta garsoorka.

Si kastaba ha noqotee, taasi ma aha caqabadda kaliya ee jirta. Fedderaaleynta nidaamka garsoorka ayaa ah mid kamid ah dhibaatooyinka qodxaha badan ee soo foodsaaray dalka, kuwaas oo soo taxnaa laga soo bilaabo sannadihii kalitaliskii Siyaad Barre. Ku tumashada sharciga iyo xukunka jahwareersan awgood, dowlad gobaleedyada iyo degmooyinka qaar waxa ay adeegsadaan nidaamyo garsoor oo iyaga u gaar ah, iyaga oo xeerarka ciqaabta u fasirta sida damacooda ku habboon.

Musuqmaasuqu, waa dhibaato dabadheeraatay oo heerkasta gaadhay. Muwaaddiniinta waxa lagu qasbaa in ay lacag bixiyaan si ay u helaan garsoor xaq ah iyo sida oo kale in ay racfaan u qaataan maxakamadaha sare. Muwaaddiniin badan ayaa taa beddelkeeda kiisaskooda geeya maxakamadaha Al-Shabaab, kuwaas oo ay u arkaan in ay caddaalad yihiin, iyaga ku eexaysanaya degdegsiimo iyo xukunno markiiba dhaqan galaya. Go'aannada maxakamadaha sharciga ah si joogto ah ayaa la iskaga indhatiraa, maaddaama aanay haysannin awood ay ku fuliyaan xukunnadooda.

> *Masuuliyiinta ka shaqeeya laantaa garsoorka lama siiyo mushahar ku filan, mararka qaarna bilo dhan ayey mushahar la'aadaan*

Masuuliyiinta ka shaqeeya laantaa garsoorka lama siiyo mushahar ku filan, mararka qaarna bilo dhan ayey mushahar la'aadaan. Inta badan waxa ay miciin bidaan musuqmaasuq' si ay nolol maalmeedkooda u dabberaan. In kasta oo uu saraakiisha garsoorka mushaharkoodu liito, waxa ay sida oo kale la kulmaan khataro amni oo aad u daran, maaddaama aanay xukuumadaha dawlad goboleedyada iyo fadderaalkuba siinnin wax ay isku difaacaan. Marar badan, waxa looga digaa in ay soo saaran go'aanno lid ku ah eedaysaneyaasha, mararka qaarna waxa loo adeegsadaa awood kulul, si loo sii daayo eedaysaneyaasha ama loo beddelo go'aannada xukunka.

Waxa wadanka oo dhan si baaxad leh ugu sii kordhaya isticmaalka nidaamyo kale oo lagu xalliyo khilaafaadka, maaddaama aanay jirin maxakamad sharciya oo la isku halleyn karaa. Qiyaasaha qaarkood, ayaa sheegaya in ka badan 80% in kiisaska madaniga ah iyo dambiyada ka dhaca Soomaaliya dhammaantood lagu xalliyo nidaamka xeer-dhaqameedka soo jireenka ah, kaas oo loo arko in uu yahay mid waxtar leh, dhakhso ah oo waafaqsan shareecada Islaamka. Si kastaba ha noqotee, nidaamka xallinta khilaafaadka ee xeer-dhaqameedku badanaa ma laha awood fulinneed oo xoog leh, waxa aanay ku tiirsan tahay u dhego-nuglaanta xukunka odayaasha dhaqanka. Hayeeshe, markii ay qaaliyoobeen ama la waayey xukun maxakamadeed oo sharci ah waxa sii xoogaysanaya nidaamka xeer-dhaqameedka, maxaa yeelay odayaasha dhaqanku waxa ay ku guuleysateen in ay xalliyaan khilaafyo badan, oo ku dhammaaday guulo loo dhan yahay. Xilligan la joogo, waxa jira dadaallo mideysan oo la isku waafajinayo nidaamka xallinta khilaafka ee xeer-dhaqameedka iyo nidaamyada maxakamadaha sharciga ah. Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo ugu yaraan laba dowladood oo xubno ka ah federaalku, waxa ay leeyihiin barnaamijyo firfircoon oo lagu kobcinayo xarumaha xallinta khilaafaadka ee xeer-dhaqameedka, iyada oo looga golleeyahay in si nidaamsan loo waafajiyo nidaamka garsoorka maxakamadaha.

Hoggaanka cusub ee ka socda wasaaradda caddaaladda fadderaalka, xafiiska xeer ilaaliyaha guud iyo maxakamadda sare ayaa soo saaray jaranjarooyin cusub oo dibuhabeyn ah, kuwaas oo loogu talagalay in lagu ballaariyo helitaanka garsoorka iyo la dagaallanka musuqmaasuqa ka dhex jira golaha garsoorka federaalka iyo hay'adaha dowladda. Awood dheeri ah ayaa loogu talagalay in la gula dagaallamo danbiyada qorshaysan, sida tahriibinta ama ka ganacsiga dadka iyo kalluumeysiga sharci darrada ah. Rabshadaha ku saleysan jinsiga (GBV) ayaa sida oo kale mudnaan la siiyey, iyada oo loo marayo dacwad ooge gaar ah. Si kastaba ha ahaatee, dhaqaale darrada joogtada ah iyo la'aanta khuburo takhasusaad gaar ah leh, sida saynisyahannada dambi baarista iyo cilmiga dambiyada ayaa caqabad ku ah dedaallada dibuhabeynta..

Si loo soo nooleeyo nidaamka garsoorka dalka ee burburay, madaxda dawladda fadderaalka Soomaaliya iyo kuwa dawladaha xubnaha ka ah fadderaalku, waxa ay u baahan yihiin in ay isu yimaaddaan oo ay isku raacaan nidaam, helaanna jaanqaad midaysan si ay u aasaasan Guddida Adeegga Garsoorka oo ah guddi madax-bannaan oo loo dhan yahay iyo Maxakamadda Dastuuriga ah. Heshiiskii Jawhar ee 2018, waxa uu dhigay sees bilow ah, laakiin waxa hakiyey xiisadaha xoogeystay ee ka dhashay ismaandhaafka-siyaadeed, kaas oo ka dhex aloosmay dowladda dhexe iyo dowlad-gobaleedyada fadderaalka. Ku soo noqoshada qaab-dhismeedkaas ayaa muhiim u ah dibudhiska nidaam garsoor oo macquul ah, karti leh oo wax ku ool ah.

## 2. Habraaca Daraasadda

Iyada oo uu kormeerayo hormuudka daraasaddani, waxa ay cilmibaareyaal ka socda Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage (HIPS) wareysteen in ka badan 24 matale oo muhiim ka ah laanta garsoorka ee heer fedderaal iyo heer dowlad-goboleed. Waxa ka mid ahaa masuuliyiin sarsare oo hadda ka tirsan garsoorka DFS, iyo kuwa hore uga tirsanaa iyo sida oo kale guddoomiyihii hore ee maxakamadda sare iyo xeer-ilaaliyihii hore. Waxa kale oo ay Cilmibaareyaasha Machadka Heritage u safreen dhammaan caasimadaha dowladaha xubnaha ka ah federaalka, waxa aanay wareysiyo muhiim ah la yeesheen ilo xog-ogaal ah oo ay ka mid yihiin wasiirrada caddaaladda ee dowlad-goboleedyada, garsooreyaal sarsare iyo khubarada qaybaha kala duwan ee garsoorka. Sida oo kale waxa la wareystay khabiirrada dastuurka iyo sharciga. Waxa aannu doorannay hannaan cilmibaariseedka habtirinta toolmoon (Quantitative approach) si aannu fahan qotodheer uga hello kuwa hadda shaqeeya iyo kuwii ka horreeyay, si kor loogu qaado talooyinka siyaasadeed ee warbixinta.

Cilmi-baareyaasha Machadka Heritage waxa ay sida oo kale sameeyeen dib u eegis balaaran oo ku saabsan xogaha oollinka ah ee la heli karo, oo ay kujiraan maqaallo tacliimeed, warbixinno iyo diiwaanno badan oo dowladeed, kuwaas oo laxiriira laanta garsoorka ee Soomaaliya, si loogu kabo xogta tiraabraaca ah ee wareysiyada. Dibu-eegista xogaha oollinka ah ayaa shaaca ka qaaday caqabadaha waaweyn ee horyaalla laanta garsoorka iyo waxyaalaha sababaya in ay adkaato in muwaaddiniinta badankoodu helaan caddaalad.

Ugu dambeyntiina, cilmibaareyaasha Machadka Heritage waxa ay sameeyeen falanqeyn nidaamsan oo ku saabsan lafo-guridda waraysiyada iyo xogaha oollinka ah ee la heli karo si ay u soo diyaariyaan warbixintan. Maaddaama caqabadaha la helay ay aad u tiro badan yihiin oo aan lagu soo koobi karin hal warbixin, waxa aannu go'aansannay in aannu xoogga saarno dhibaatooyinka qaab-dhismeedka, siyaasadeynta, xeeladaha iyo ficillada la taaban karo ee la qaadi karo, kuwaas oo dib loogu dhisayo nidaamka caddaaladda si loo helo kalsooni dadweyne.

## 3. Hordhac iyo dulucda taariikheed

> *"Nidaamka garsoorka Soomaalida ee rasmiga ahi waxa uu soo taxnaa laga soo bilaabo waagii gumaystaha, markii Ingiriisku xukumayey gobollada waqooyi (Somaliland) Talyaaniguna xukumayey gobolada Koonfureed(Somalia)*

Nidaamka garsoorka Soomaalida ee rasmiga ahi waxa uu soo taxnaa laga soo bilaabo waagii gumaystaha, markii Ingiriisku xukumayey gobollada waqooyi (Somaliland) Talyaaniguna xukumayey gobolada Koonfureed(Somalia). In kasta oo labada nidaamba ay u oggolaadeen Soomaalida in ay u adeegsadaan shareecada iyo xeer dhaqameedka arrimaha qoyska (tusaale, furriinka iyo dhaxalka), haddana dacwadaha kale waxa ay hoos imanayeen maxkamadaha sharciga ah, kuwaas oo si toos ah u hoostagayey maamullada gumeystaha.[1] Marka laga yimaaddo kala duwanaanshaha soo jireenka ah ee u dhexeeya Sharciga Wadajirka ah ee uu Ingiriisku ku isticmaali jiray Somaliland iyo Xeerka Madaniga iyo Ciqaabta ah ee uu

1 Le Sage, A. "Caddaaladda Qarankeedu dumay ee Soomaaliya. (2005)." Xarunta HD. https://www.files.ethz.ch/isn/20303/Somalia_stateless_justice.pdf

Ingiriisku ku isticmaali jiray Soomaaliland iyo Xeerka Madaniga iyo Ciqaabta ah ee uu Talyaanigu ku isticmaali jiray koonfurta Soomaaliya, labada maamul ee gumeystaha ahi, waxa ay saameyn ku yeesheen nidaamkii garsoorka Soomaaliya ee xorriyadda ka danbeeyey. Saddex dariiqo oo aasaasi ah ayay saamayntu ka dhalatay: marka hore, labaduba waxa ay aasaaseen garsoor: cilmaani ah, sharciga reer galbeedkana ku salaysan, isla markaana waxa la soo dheegtay sida uu u kala sarraysiiyey arrimaha dambiyada; tan labaad, labaduba waxa ay oggolaadeen nidaamka xeer-dhaqameedka Soomaalidu[2] in uu ahaado mid inta badan dhawrsan, maadaama codsigoodu aanu khatar ku ahayn amniga bulshada; iyo tan seddexaad oo ay arrinta ugu muhiimsani tahay udub-dhexaadnimada shareecada Islaamka ayaa ahaa nidaamka garsoorka ee aan far la saarin. Sida uu Professor Andre Le Sage u fiirsaday, "nidaamkan garsoorku waxa uu ilaaliyey hannaanka dowladeed ee rasmiga ah,kaas oo gayeysiiyey in uu waaro, oo aan la barobixinnin ku dhaqanka xeer-dhaqameedka Soomaalida."[3]

## 3.1 Nidamkii Garsoorka ee ka danbeeyey (1960—1962)

> *Qarankii cusbaa waxa uu dhaxlay afar sharci oo kala duwan, kuwaas oo dalka ka wada shaqayn jiray, loona isticmaali jiray marxalado kala duwan*

Kadib markii ay maxmiyaddii Soomaaliland xornimada ka qaadatay dawladaha Ingriiska, Soomaaliyana ka qaadatay gumaystihii Talyaaniga, ayaa waxa dhalatay jamhuuriyaddii Soomaaliya. Qarankii cusbaa waxa uu dhaxlay afar sharci oo kala duwan, kuwaas oo dalka ka wada shaqayn jiray, loona isticmaali jiray marxalado kala duwan. Arrintaasi waxa ay abuurtay jaahwareer sharci. Ka sokaw shareecada Islaamka iyo xeerka-dhaqameedka, waxa kale oo ay maxAkamadaha dalka curdinka ahi, isticmaali jireen xeerka Ingriiska ( British common Law) iyo sharciga Talyaaniga (Italian continental Law).[4] Maxakamaduhu may ahayn meesha kaliya ee kala duwanaanta sharcigu ka jirto, balse waxa kale oo ay la daalaadhacayeen shuruuc ku qoran luuqado kala duwan. Gobollada waqooyi (Soomaaliland), sharcigu waxa uu ugu qornaa luuqadda Ingiriisida,halka maxakamadaha koonfurtana luuqadda Talyaaniga lagu shaaqaynayay. ArrinkaaswaxaloosababaynkaraainaanayxilligaaasjirinfartaSoomaaligu,taas oo kalliftay in la isticmaaalo afaf qalaad.[5]

## 3.2 Isbeddelkii koowaad ee garsoorka (1962-1969)

kadib labo sano oo jaahwareer ah, oo la wajahay caqabado ugub ah ayaa loo tafoxaytay abuuritaanka nidaam garsoor oo mideysan, waxa aanay dowladdii cusbayd ee Soomaaliya dhistay guddi heer qaran ah oo arrinta si taxaddar leh u darsista, soona jeedisa tallaabooyin wax ku ool ah. Guddida Wadatashiga ee Isdhexgalka Nidaamyada Sharciga (CCILS) ayey golaha wasiirradu siiyeen awood ballaaran. Guddida oo ka koobnaa xeeldheerayaal sharci iyo aqoon yahanno kale ayaa safar ku maray dalka oo dhan, ugu danbaynna waxa ay ku guulaysteen in ay qoraan sharci aad loo la dhacay, kaas oo uu ujeedkiisu ahaa in lagaga gudbo jaahwareerkii jiray.[6] Sannadkii 1962 baarlamaaankii Soomaaliya waxa ay ansixiyeen sharci abuuraya gole shaqadiisu ahayd in uu mideeyo sharciyadii kala duwanaa ee dalka ka jiray. Ilaa haddana sharcigaas qaybo ka mid ah ayaa wali dalka laga adeegsadaa.

---

2 Qayb ka mid ah warbixintan, ayaa loogu talagalay Xeer-dhaqameedka iyo heerka uu hadda ka joogo Soomaaliya.
3 Ibid.
4 Akaadamiyada Nabadda iyo Horumarka - APD. (2002). "Nidaamka Garsoorka ee Somaliland." https://apd-somaliland.org/wp-content/uploads/2014/12/JUDICIARY-REPORT-FINAL.pdf
5 Afka Soomaaliga waxaa si rasmi ah loo hirgaliyey 1972, oo ah xilligii kalitaliyihii Siyaad Barre.
6 Wareysi aan la yeelanay guddoomiyihii hore ee baarlamaanka Maxamed Jawaari. (Sibteenbar 2020). Muqdisho.

Waxa cajiib ahayd, inkasta oo uu sharciga cusubi u muuqday isbeddel horumar leh, dhab ahaan waxa uu sii kordhiyay murugsanaaantii hore u jirtay. Sharcigu waxa uu dhigayay in xeerka madaniga ah iyo kan ciqaabta lagu saleeyo ka Talyaaniga, isla markaana habraaca xeer ciqaabeedka waxa la waafajiyay ka Hindiya. Waxa kale oo sharcigu ogolaaday in shareecada Islaamka loo isticmaalo arrimaha qoyska, sida furniinka iyo dhaxalka. Xeer-dhaqameedkana waxa laga dhigay mid u furan xallinta khilaafaadka bulshada.[7] Si kale haddii loo dhigo, sharciga cusubi waxa uu meesha ka saaray sharcigii Ingiriiska, waxaana lagu beddelay ka Hindiya. Waxa jiray dhawr arrimood oo loo aaneeyo sababta arrintaasi u dhacday. Tan ugu macquulsanina waxa ay ahayd in markii xorriyadda laqaatay guddoomiyihii koowaad ee maxakamadda sare laga dhigay Hindi Muslin ah, kaas oo loo keenay in uu dalka ka caawiyo sidii dhidibbada loogu taagi lahaa nidaamkii bilawga ahaa ee garsoorka Soomaaliya.

Bishii Juun 1962, waxa la ansixiyay sharciyo kumeelgaar ahaa oo ay ka mid ahaayeen Dastuurka iyo Xeer-dejinta Sharciga-Lambar 3, oo si rasmi ah u mideeyay dhammaan nidaamka garsoorka ee hoos imanaya Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta. Sharcigan markii la ansixiyay waxaa dhamaystirmay qaab-dhismeedka iyo kala sarraynta nidaamka garsoorka oo ay ugu sarrayso maxakamadda sare,maxakamadda racfaankuna ku xigto, uguna hooseeyaan maxamadaha gobollada iyo dagmooyinku.




7 Le Sage. Ibid.

Arrimo dastuuri ah ayaa soo baxay. Markii arrintaa lagu guda jiray, maxakamadda Dastuurka oo ay shaqaadeedu tahay marka uu khilaaf dastuur yimaaddo , waxa sharcigu u jideeyay habraac u gaar ah[8] oo u sheegaya in baarlamaanka iyo Madaxwaynuhu min laba garsoore oo aan xubno ka ahayn baarlamaanka u soo magacaabaan maxakamadda tastuuriga ah, waa kaliya haddii ay jirto xaalad khilaaf oo tastuuri ahi. Afarta garsoore ee cusub awooddoodu waxa ay jiraysaa uun inta uu xaaladaas dhagaysigeedu socdo, marka go'aan laga gaaro dhagaysiga arrinkaas na awoodoodu halkaas ayay ku dhammaanaysaa. Waxa sida oo kale markii ugu horraysay la asaasay jagada xeer-ilaaliyaha guud, sida oo kalena waxa ay noqonayaan hoggaanka garyaqaanka guud ee qaranka cusub. Dabcan, waxa iyana tallaabo wanaagsan ahayd in la asaasay Golaha Sare ee garsoorka (HJC) si ay u ilaaliyaan, una hormariyaan madax-bannaanida nidaamka caddaaladda. Golaha Sare ee garsoorka shaqadoodu waxa ay ahayd shaqaalaysiinta, dalacsiinta, shaqo ka cayrinta iyo maamulidda dhammaan dhaqaalaha nidaamka garsoorka.[9]

Halka ay maxakamadaha koonfureed ee ay xaruntoodu ahayd caasimadda Muqdisho shirciyadaas halhaleel ku hirgaliyeen, Maxakamadaha waqooyiga ee uu hore Ingiriisku u gumaystay waa ay ka biyo-diideen habka cusub, waxa aanay sii wateen in ay xeerarka madaniga ah iyo ka ciqaabtaba u isticmaalaan sharciga Ingiriiska. Waxase barbar socday Shareecada Islaamka iyo Xeer-dhaqameedka.[10] Inkasta oo ay jiri kareen sababo kale, hayeeshee in uu sii socdo isticmaalka sharciga Ingriisku waxa sababta ugu wayn lagu sheegay xaqiiq ada ah in garsooreyaashii Ingiriiska wax ku soo bartay aaanay af Talyaaniga aqoonnin.

## 3.3 Askariyeyntii nidaamka Garsoorka (1969-1991)

> *Inkasta oo maxakamadaha qaarkood sida maxakamadihii caddaaladda dib loo asaasay, waxa awooddoodii shiikhiyey Maxakamaddii Badbaadada Qaranka (NSC), taas oo laamo ku lahayd dhammaan dagmooyinka iyo gobollada dalka*

Bishii October 1969 ayaa uu ciidankii xoogga dalka Soomaaliyeed kula wareegay inqilaab aan dhiig ku daadan talada dalka, kadib markii la dilay Madaxwaynihii dalka Cabdirishiid Cali Sharma-Arke. Iyaga oo marmarsiinyo been ah ka dhigtay in dalku galayo jaahwareer awoodeed, iyo in uu jiro mususmaasuq baahsani. Xukunka askarta ee cusub oo uu hoggaaminayay taliyihii ciidamada qalabka sida Sarreeye gaas Maxamad Siyaad Barre, ayaa laalay dastuurkii dalka, isla markaana waxa ay xabsi ku gureen inta badan madaxdii ugu sarraysay dawladii rayidka ahayd ee shacabku doorteen.

Sida la qiyaasi karaba, xukunkii kaaligii taliska ahaa waxa uu markiiba ku dhaqaaqay in uu burburiyo nidaamkii garsoorka, waxa aanay degdeg ku asaaseen Maxakamaddii Badbaadada Qaranka oo aad looga cabsan jiray.[11] Inkasta oo maxakamadaha qaarkood sida maxakamadihii caddaaladda dib loo asaasay, waxa awooddoodii shiikhiyey Maxakamaddii Badbaadada Qaranka (NSC), taas oo laamo ku lahayd dhammaan dagmooyinka iyo gobollada dalka. Waxa aanay si toos ah u hoos imanaysay xukunkii askarta. Maxakamaddii Badbaadada Qaranka waxa ay noqotay astaan awood badan oo u taagan nidaamka caddaaladda iyo aalad loo adeegsado cabburinta kuwa askarta dhaliila. Awoodaheeda aan xadka lahayn waxa ka mid ahaa in ay xukunto wax kasta oo askartu u aragto in ay khatar ku yihiin amniga qaranka.[12] Xaqiiqdu se, waa in doorka ugu muhiimsan ee Maxakamaddii Badbaadada Qaranku ahaa in ay nidaamkii askarta ku difaacdo wadda kasta oo suuragal ah.

---

8 Wareysi laga qaaday Jawaari. Ibid. Ibid.
9 Ibid.
10 APD. Ibid.
11 Wareysi lala yeeshay guddoomiyihii hore ee maxakamadda sare ee Soomaaliya Ibraahim Iidle Suleymaan (Sibteenbar 2020). Muqdisho.
12 APD. Ibid.

Garsooreyaasha Maxakamaddii Badbaadada Qaranka ayaa si toos ah looga soo dhex magacaabii jiray saraakiisha sarsare ee askarta, waxaana la siin jiray awoodo badan oo ay shacabka ku xiraan, hantidoodana kula wareegaan. Maxakamaddii Badbaadada Qaranka waxa la siiyay awood ay maxakamadaha hoose dacwadaha ka gala soo wareegto marka ay rabto, iyada oo la buunbuuninayo eedaymaha yar yar, lagana dhigayo in ay yihiin wax amniga qaranka lid ku ah. Cidda kaliya ee sharcigu u ogolaa in ay racfaan ka qaataan go'aannada Maxakamaddii Badbaadada Qaranka waxa ay ahaayeen xubnaha Golihii Sare ee Kacaanka (SRC), kuwaas oo ahaa madaxdii ugu sarraysay fulintii nidaamka askarta.[13]

Madaxdii nidaamka askartu waxa ay aad ugu talaxtageen in ay dib u sameeyaan nidaamka garsoorka dalka, iyaga oo adeegsanaya waxa ay ugu yareen Mabaadi'da Hantiwadaagga Cilmaaniga ku dhisan. Askartu waxa ay aad u xaddideen doorka shaareecada Islaamka iyo xeer- dhaqameedka Soomaalida. "Xeerkii diyada ama qaanta qabiilladu ku kala qaadan jirtay ayaa la laalay. Qofkii qof dilana waxaa laga dhigay dil. Wixii dhaawac ahna magdhaw qofka qoyskiisu bixinayo. [14]

Dabcan natiijada ugu raadaynta badan ee ka dhalatay nidaamkii garsoorka Siyad Barre waxa ay ahayd rabitaankiisa ah in uu udub dhexaad u noqdo nidaamka garsoorka, sida inta kale ee xukunkiisa kalitalisnimada ah. Sannadihii xukunka askartu jiray Golihii Sare ee Kacaanka waxa ay soo saareen digreetooyin badan oo guud ahaan meesha lagaga saaray wax kasta oo laga dhadhansan karayey madax-bannaanida garsoorka, maxakamadihiina waxa laga soo buuxiyey kuwo askarta u daacada, taas oo wiiqday maxakamadaha, marka laga reebo Maxakamaddii Badbaadada Qaranka. 1991 markii Jabhaduhu Siyaad Barre awoodda ka tureen, nidaamkii garsoorku waxa uu ahaa magac-uyaal marka loo eego kii xilligii dawladdii rayidka ahayd ee 1960- aadkii.

## 3.4 Dagaalkii sokeeye kadib (1991-2000)

> *Hay'addii garsoorka ee dalkuna waxa ay noqotay mid aan waxba dhaamin xeerka duurjoogta, inkasta oo beeluhu khilaafkooda hoose ku xallinayeen habkii Xeer-dhaqameedka*

Si la mid ah, sida uu noqday haykalkii kale ee dalku, ayaa ay dagaalladii sokeeye ee bilaabmay markii xukunka laga tuuray Siyaad Barre 1991 kii u burburiyeen nidaamkii garsoorka dalka. Hay'addii garsoorka ee dalkuna waxa ay noqotay mid aan waxba dhaamin xeerka duurjoogta, inkasta oo beeluhu khilaafkooda hoose ku xallinayeen habkii Xeer-dhaqameedka.

Markii 1991 kii Soomaaliland ku dhawaaqday in ay tahay dal madax-bannaan aanse adduunku aqoonsan, nidaamkii garsoorka ayay dib u usaaseen. Qodobka 103.5 dastuurka Soomaaliland waxa uu si cad u qeexayaa in inta shuruuc cusub laga hirgalinayo lagu sii dhaqmayo shuruucdii dawladda Soomaaliya hirgalisay 1991 ka hor, waa haddii aanay ka hor imaanaynin shaareecada Islaamka, kuna xadgudbaynin xuquuqda muwaadinka.[15] Taasina waxa ay ahayd tallaabo muujinaysay fahan wanaagga Soomaaliland, inkasta oo ay sheegeen in ay ka go'een Soomaaliya, haddana wax ay sii wadeen isticmaalka nidaamkii garsoorka ee Soomaaliya.

13 Le Sage. Ibid.
14 Ibid.
15 APD. Ibid

Puntland waxa kale oo ay dhistay Golaha adeegga garsoorka oo la mid ah kii jiray 1960-aadkii, golahaas oo ay shaqadiisu tahay in ay kormeeraan waaxda caddaaladda

Puntland waxa ay iyana qaadday tallaabooyin kuwaas la mid ah, ka dib markii la asaasay 1998, ee ay noqotay maamul goboleedkii ugu horreeyay maamullada ka tirsan dawladda fedderaaalka Soomaaliya. Puntlaand sida Soomaaliland iskumay dayin in ay ka go'do Soomaaliya. Inkasta oo aanay jirin dawlad dhexe waxa ay asaastay nidaam garsoor oo adag. Sharciga no. 2 1999,waxa uu abuuray nidaam saddex maxakamadood ah oo kala sarreeya. Maxakamadda degmada oo ah tan dacwadda ugu hor dhagaysata, maxakamadda sare oo xarunteedu tahay caasimadda Garoowe, iyo maxakamadda racfaanka oo ku taaalla caasimad-goboleedka kasta. Puntland waxa kale oo ay dhistay Golaha adeegga garsoorka oo la mid ah kii jiray 1960-aadkii, golahaas oo ay shaqadiisu tahay in ay kormeeraan waaxda caddaaladda. Waxa kale oo la sameeyay xafiiska xeer-ilaaliyaha guud, kaas oo ka tirsan waaxda caddaaladda.[16] Puntland wali nidaamkaas ayay isticmaashaa ilaa iyo haddana waa nidaamka dalka ugu horumarsan.

## 3.5. Dibu-eegista Nidaamka Garsoorka (2000-2009)

Markii maagalada Carta ee dalka Jabuuti dib loogu yagleelay Jamhuuriyaddii Saddexaad ee Soomaaliya dayrtii 2000, waxa la dajiyey Axdi-Qarameed Kumeelgaarka ah oo ay isku raaceen kumannaan ka mid ah waftidii shirkaa taariikhiga ah ka soo qaybgashay, waxaana si wada jir ah loogu baaqay in dib loo dhiso hay'ad garsoor oo madax-bannaan, taas oo ay weheliyaan hay'adaha sharci-dejinta iyo fulintu. Iyaga oo saddexdaa hay'adood ugu yeeraya " laamo dawladeed oo siman ", Axdigu waxa uu qeexay tallaabooyin cadcad oo dib loogu eegayo nidaam-qarameedkii hore ee garsoorka. [17]

### Garsoorka iyo nidaam-beeleedka 4.5

Marka loo eego natiijadii ka dhalatay heshiiskii awood-qeybsiga beelaha Soomaaliyeed, muddadii lagu gudajiray shirkii Carta ee ka dhacay dalka Jabuuti, waxa la isku raacay in jagooyinka muhiimka ah ee dalka loo qaybiyo afar qabiil oo waaweyn (Daarood, Hawiye, Raxanweyn iyo Dir) iyo beelaha yar yar oo isku garab ah. Nidaamkan cusub oo loo bixiyey 4.5, waxa uu hab isu-dheellitiran oo macmal ah talada talka gacanta ugu galiyey afar qabiil. Madaxweynaha iyo Raysalwasaaraha waxa loo qoondeeyey Hawiye iyo Daarood, af-hayeenka baarlamaanka waxa la siiyey Raxanweyn, maxakamadda sare na waxa qaatay Dir. Is- afgaradkan ayaa la is kula qaatay in qabiil kastaaba uu xukumo qaybtiisa, sidaa darteed beelaha Dir, ayaa wali sii wada in ay doorka ugu weyn ka qaataan Hay'adda garsoorka. Muddo 20 sano ah oo ka soo bilaabanta shirkii Carta, guddoomiyaha maxakamadda sare waxa uu ka imanayey beelaha Dir, sida oo kale beelahaasi waxa ay haysteen xeer-ilaaliyaha guud ilaa sannadkii hore. Si la mid ah sida wax kasta oo kale oo Soomaaliya ka jira yihiin, ayaa ay xaqiiqadan taariikhiga ahi ku sii socotaa in uu madhaxeedu noqdo waxyaalo badan oo aan hadda la filanaynin, taas oo ah mid ka mid ah cidhib xumada tirada badan ee aan laga filanaynin nidaamka 4.5.

16 Wareysi lala yeeshay xeer-ilaaliyaha guud ee Puntland, Maxamuud Xasan Cismaan (Oktoobar 2020). Garoowe.
17 Eeg axdiga kumeelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliya (2000).

Si kastaba ha ahaatee, hawshan cakirani waxa ay wajahday caqabado aad u waaweyn ka dib markii ay hoggaamiyeyaasha dawladda ku meelgaarka ahi ay riyaaq ku soo galeen Muqdisho dabayaaqadii sannadkii 2000. Xilligaas caasimadda Muqdisho waxa haystay hog aamiye kooxeedyo uu mid waliba qabiil gaar ah maamulo. Maamulkii madaxweynihii Cabdiqaasim Salaad Xasan, oo hore wasiir uga soo noqday dawladdii Siyaad Barre, ayaa halgan u galay sidii uu xukuumaddiisa uga hirgalin lahaa degmooyin kooban oo ka baxsan magaalada Muqdisho. Inkasta oo ay dawladdii kumeelgaaarka ahayd u riyaaqday taageerada ballaadhan ee ay ka heshay bulsho weynta Soomaaliyeed gaar ahaan reer Muqdisho, haddana waxa lugaha qabtay awood darro, taas oo ay tallaabo ka qaadi kari wayday, haba u yaraato in ay dib u aasaasto nidaamkii garsoorka'e.

Arrimo kale, oo ay ka mid ka ahaayeen wadahadallo siyaasadeed oo la la yeeshay hogaamiye-kooxeedyada iyo sugidda ilaha dakhliga, ayaa laga doorbiday in dib loo soo nooleeyo hay'addii garsoorka. Dawladda kumeelgaarka ahi waxa ay maxakamadda sare u magacowday guddoomiye, taas oo ahayd hawl aan xaqiiqo ahaan u jirin, waxa aanay wasaaraddeedii caddaaladdu iyada oo aan cidina ka caawinnin, si hagar la'aan ah isku dayday in ay dib u dhisto qaar ka mid ah maxakamadihii Muqdisho. Markii la soo gaaray Sannaddkii 2003, maxakamaddii cusbayd ee ay magacawday dawladda kumeelgaarka ahi may sii shaqaynaynin, sababta oo ah mushaharkii shaqaalaha ayey bixin kari wayday muddo sannad ka badan.[18]

*"Xarigga guddoomiyaha ayaa gilgiley guud ahaan laanta garsoorka, arrintanna waxa loo arkay bahdilaad iyo Sharaf ka xayuubin uu madaxweynuhu kula kacay nidaamka caddaaladda*

2004 tii, ayaa Dawladdii kumeelgaarka ahayd loo beddelay Dawladda Fadderaalka Kumeelgaarka ah. Cabdillaahi Yuusuf ayaa loo doortay madaxweyne, waxaana la isla qaatay dastuur cusub oo kumeelgaar ah. Cabdillaahi Yuusuf oo ahaa aasaasihii iyo madaxweynihii ugu horreeyey ee Puntiland ayaa halgan adag u galay in uu dalka ka hirgaliyo xukuumaddiisa. Madaxaweyne Cabdillaahi Yuusuf, waxa uu awood u yeeshay in uu laba sano ka dib markii la doortay u soo guuro magaalada Muqdisho. Isla markiiba waxa uu khilaaf weyni soo kala dhex galay madaxweynaha iyo guddoomiyaha maxakamadda sare oo uu isagu magacaabay. Cabdullaahi Yuusuf ayaa amar ku bixiyay Tallaabo ugub ah, oo ahayd in la soo xiro guddoomiyaha maxakamadda sare, kaas oo lagu xiray xabsi ku dheggan madaxtooyada. Xarigga guddoomiyaha ayaa gilgiley guud ahaan laanta garsoorka, arrintanna waxa loo arkay bahdilaad iyo Sharaf ka xayuubin uu madaxweynuhu kula kacay nidaamka caddaaladda.

18 Le Sage. Ibid.

## Midowga Maxaakiimta Islaamiga ah

Horraantii sannadkii 2005, waxa magaalada Muqdisho laga hirgaliyey Midowga Maxaakiimta Islaamiga ah (UIC). Ujeeddadu waxa ay ahayd in la helo nabad iyo cadaalad, iyada oo loo marayo in beelaha Soomaalida lagu maamulo ku dhaqanka shareecada Islaamka. Midowga Maxakamadaha Islaamiga oo ka koobnaa tobannaan maxakamadood, kuna salaysnaa nidaam beelaysan ayaa unkamay. Midowga Maxakamadaha Islaamiga ah, waxa xannibaado ku soo rogay hay'adihii sirdoonka Maraykanka. Iyada oo ay cabsiyi jirto wixii ka danbeeyay qaraxii daaraha maraykanka ee 9-11, maxakamadahu waxa ay xidhiidh dhaw la yeesheen kooxaha mitidiinta ah, Maraykankuna waxa uu Muqdisho ku dhaleeceeyey in ay u aqoonsadeen xarunta dagaal oogeyaasha waxa aanay taageero siiyeen Midowga Maxakamadaha Islaamiga ah si ay ula dagaallamaan kooxa malleeshiyaadka. Si kastaba ha noqotee, maxakamadihii waxa ay jabiyeen kooxihii malleeshiyaadka ahaa, waxa aanay taageero badan ku kasbadeed nidaamka caddaaliga ah ee ay sida degdegga ah uga hirgaliyeen dalka oo dhan. Waxa ay si dhakhso ah u qabsadeen deegaanno badan oo koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya ku yaalla, iyaga oo ku hakaday Puntland. Mareykanka oo yaabban, ayaa taageeray duullaankii ay Itoobiya koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya ku soo gashay iyo soo dejintii Muqdisho ee Dawladda Fedderaalka Kumeelgaarka ah. Dagaal arxan daran iyo laba sano oo iska caabbin ah ayaa la galay. Al-Shabaab, oo ah koox xagjir ah oo aan hore loo aqoon ayaa la soo safatay Midowgii Maxakamadaha Islaamiga ah, waxa aanay ku soo caanbaxday iska caabbinta Itoobiya. Laba sano ka dib, Itoobiya waxa lagu qasbay in ay ka baxdo Soomaaliya, iyada oo heshiis gorgortan ah lagu galay magaalada Jabuuti, halkaas oo la iskula gartay in hoggaamiyihii hore ee Midowga Maxaakiimta Islaamiga ah Sheekh Shariif Sheekh Axmed loo doorto madaxweyneha Soomaaliya. Al-Shabaab ayaa noqotay kooxda ugu awoodda badan dalka, waxa aanay halkaas ka sii wadday dagaalladeedii oo ay ilaa hadda kula jirto dawladda Soomaaliya.

*"Al-Shabaab ayaa noqotay kooxda ugu awoodda badan dalka, waxa aanay halkaas ka sii wadday dagaalladeedii oo ay ilaa hadda kula jirto dawladda Soomaaliya*

# 4. Dibudhiska Nidaamka Garsoorka

Horraantii sannadkii 2009, markii madaxweyneha dawladda fedderaalka kumeelgaarka ah loo doortay Shiikh Shariif Shiikh Axmed oo hore na u ahaa hoggaamiyihii Midowga Maxaakiimta Islaamiga ah, kaas oo sumcad qaran ku kasbaday in uu bulshada reer Muqdisho ka dhaqangaliyo ku dhaqanka shareecada Islaamka, xilligaas ayaa waxaa la qaaday tallaabooyin la taaban karo oo dib loogu dhisayo nidaamka caddaaladda ee dalka markii ugu horreysay tan iyo dagaalladii sokeeye. Madaxweyne Shariif, waxa uu si kumeelgaar ah u aasaasay Golaha Adeegga Garsoorka (JSC), oo ah hay'ad u xilsaaran kormeerka nidaamka caddaaladda. Arrintaasina waxa ay ahayd tallaabo muhiim u ah dhismayaasha nidaamka cusub ee caddaalada .Madaxweyne Shariif intii uu xilka hayey waxa uu maxakamadda sare ee curdinka ahayd u magacaabay laba guddoomiye , taas oo u sii kobcaysa maxakamad sare oo dhammaystiran. Waxa uu mar labaad guddoomiyaha maxakamadda sare u magaacabay Caydiid Cabdillaahi Ilkaxanaf, oo ah sharciyaqaan si weyn loo xushmeeyo, hore na uga soo mid noqday baarlamaanka federaalka. Ilkaxanaf waxa uu guud ahaan raad kaga tagay caddaaladda, gaar ahaanna maxakamadda sare.

*"Xilligaas ayaa waxaa la qaaday tallaabooyin la taaban karo oo dib loogu dhisayo nidaamka caddaaladda ee dalka markii ugu horreysay tan iyo dagaalladii sokeeye*

Waxa uu isku dubbariday dhamaanba awoodaha laamaha garsoorka dowladda, waxaana uu awoodaha garsoorka u baahiyey si aanay kuwii isaga ka horreeyey hore ugu ballaarin. Si kastaba ha noqotee, dadka dhaliila Ilkaxanaf, waxa ay yiraahdaan, waxa uu ahaa " Halgamaa u dhaqdhaqaaqa garsoorka, kaas oo hub ahaan u adeegsaday awoodda kursiga si uu u yeesho saameyn siyaasadeed oo aan loo baahnayn." [19]

## 4.1. Kala dirista Golaha kumeelgaarka ah ee Adeegga Garsoorka

In kasta oo uu Ilkoxanaf lahaa awood aad u weyn, haddana waxa uu ka tallaabsan kari waayey caqabadaha maalinlaha ah ee kaga imanayey golaha adeegga garsoorka kumeelgaarka ah, kuwaas oo lahaa awoodda qoridda ama eryidda garsoorayaasha ka hawlgala fadhiga federaalka. Iyaga oo adeegsanaya awooddooda si ay dusha u gala socdaan laanta garsoorka, golaha adeegga garsoorka ee kumeelgaarka ahi, waxa ay yareeyeen awoodda fulinta guddoomiyaha maxakamadda sare, isaga oo rabay in uu laan madax-bannaan u qaabeeyo fadhiga federaalka. Dhawr sannadood ba waxa uu aad uga xumaa hab-dhaqanka uu u arkay in uu yahay isku day ulakac ah oo lagu boqnogoynayo.[20]

Si looga gudbo jidgooyada ay dhigteen golaha adeegga garsoorka ee kumeelgaarka ahi, Ilko-xanaf waxa uu aad ula ololeeyey madaxweynihii cusbaa ee la doortay Xasan Shiikh Maxamuud, iyo lataliyeyaashiisa gaarka ah. Waxa uu istusay in golaha adeegga garsoorka ee kumeelgaarka ahi yihiin sharci-darro iyo sharwadeyaal. Dooddiisu may ahayn arrin xaqiiqada baal marsan, golahanna waxa lagu unkay qodobka 63-aad ee Axdiga Federaalka Kumeelgaarka ah, oo ay muddadiisu ku ekayd Ogosto 2012, sida oo kale Dastuurka[21] cusub ee Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya, waxa la ansixiyay Sibteenbar 2012, kaas oo qeexaya dhammaan hannaanadii kala duwanaa ee lagu aasaasay golaha kumeelgaarka ah ee adeegga garsoorka . Intaa waxa dheer, in uu golahani si dhab ah isu hortaagay maxakamadda sare, iyada oo ka falcelineysa rabitaanka Ilkaxanaf oo ahaa in uu xididdada u siibo golahan kormeeraya ee xannibaadda ku ah awoodihiisa.

> "
> *Madaxweyne Xasan Shiikh ayaa dibuhabeynta caddaaladda u aqoonsaday mid ka mid ah lixda tiir ee qorshe-siyaasadeedkiisa ugu muhiimsan*

Madaxweyne Xasan Shiikh ayaa dibuhabeynta caddaaladda u aqoonsaday mid ka mid ah lixda tiir ee qorshe-siyaasadeedkiisa[22] ugu muhiimsan, waxa uu ku qancay in sii jiritaanka golaha kumeelgaarka ah ee adeegga garsoorku dabar ku yahay ajandayaashiisii dibuhabeynta ee uu maanka ku hayay. Waxa uu kala diray golihii, isaga oo ujeedkiisu ahaa in uu sameeyo gole cusub oo waafaqsan dastuurka cusub isla markaana la jaanqaadaya qorshihiisa dibuhabeynta caddaaladda. Sida oo kale waxa uu ogaa in aanay dowladiisu kumeelgaar sii ahaan doonin muddo dheer, oo ay leedahay awoodo maamul oo maangal u muuqda marka loo eego kuwii ka horreeyay. Go'aankaasi waxa uu culeys saaray Madaxweyne Xasan Sheekh maadaama uu dhowr jeer ku guuldareystay in uu dhiso gole cusub.

---

19 Wareysi lala yeeshay lataliyihii hore ee sharciga xafiiska Madaxweynaha (Nofeembar 2020).

20 Wareysi lala yeeshay wasiirkii hore ee caddaaladda Soomaaliya (Oktoobar 2020).

21 Interview with former Somali justice minister. Ibid.

22 Cali, A. "Somaliya: Horumarka aan lagu qancin ". (Jan. 2014). Xarunta Daraasaadka ee Al Jazeera. Ee laga galo:https://studies.aljazeera.net/en/reports/2014/01/20141297747673110.html

## 4.2 Shirka Dibuhabaynta Caddaaladda

> Shirkaasi waxa uu ahaa mid muhiim ah oo aan noociisa hore loo arkin." Sidaas waxa qoray qabanqaabiyeyaashii shirka, kuwaas oo lataliyeyaal u ahaa madaxweynaha

Sannadkii 2013, ayaa ay xukuumaddii Xasan Shiikh qabanqaabisay shir qaran oo ku salaysnaa dibuhabaynta caddaaladda isaga oo gogosha u ballaadhinaya talooyinka ka imanaya bulshada Soomaaliyeed. Dad ka badan 200 qof oo iskaga yimi dal iyo dibed ayaa huteel Muqdisho ku yaalla ku shirayey dhawr maalmood, si ay uga doodaan caqabadaha faraha badan ee soo foodsaaray nidaamka caddaaladda Soomaaliya. Dadkaa waxa ka mid ahaa xubno ka tirsan garsoorka,sharciyaqaanno, garsooreyaal hore, xeer-ilaaliyeyaal, xubno ka tirsan golaha sharcidajinta iyo hoggaamiyeyaal bulshada dhexdeeda caanka ah, waxa kale oo golaha fadhiyey saraakiil caddaaladeed. "Shirkaasi waxa uu ahaa mid muhiim ah oo aan noociisa hore loo arkin." Sidaas waxa qoray qabanqaabiyeyaashii shirka, kuwaas oo lataliyeyaal u ahaa madaxweynaha[23]. Intaas waxa ay ku dareen in uu Madaxweyne Xasan Shiikh fahmay in ay dibuhabeyntaasi barbilow fiican u noqonayso wadahadallo dhab ah oo dhexmara dadka Soomaaliyeed, taasina waxa ay ahayd ujeeddo ka mid ah go'aannada shirkaas lagu gaaray.

Ka dib markii ay falanqeeyeen ku dhowaad toddobaad, ka qeybgalayaashu waxa ay ay soo saareen talooyin[24] aad u yool wanaagsan: waxa ay ku boorriyeen dowladda in ay qaaddo 19 tallaabo-siyaasadeed oo wax ku ool ah , gaar ahaan in la sameeyo gole garsoor oo cusub iyo in la sameeyo Maxakamadda Dastuuriga ah ee Soomaaliya. Waxa ay sida oo kale xildhibaannada sagaalaad ee Soomaaliya ka codsadeen in ay taageeraan dowladda oo ay soo saaraan shan sharci oo gaar ah, kuwaas oo ay ku jiraan sharciyada lagu aasaasayo golaha kumeelgaarka ah ee adeegga garsoorka, Maxakamadda Dastuurka Soomaaliya iyo Guddiga Xuquuqda Aadanaha - saddexdaas hay'adood oo ay tahay in si wada jir ah loo dhiso si loo waafajiyo shuruudaha dastuurka.

> Waxa aannu ognahay in ay tahay mashruuc muddo dheer qaadanaya, mana fududa in si dhib yar dib loogu dhiso bulsho soo martay in ka badan labaatan sano oo rabshado iyo xasilooni darro ah." sidaas ayey qoreen

Qabanqaabiyeyaashu[25] waxa ay qireen in inkasta oo uu shirku muhiim u ahaa dibuhabeynta caddaaladda, in aanay haddana u badnayn in uu xalliyo dhibaatooyinka badan ee horyaalla. "Annaga oo ah qabanqaabiyeyaashii iyo ka qeybgalayashii shirkan ma nihin wax magarato; ee waxa aannu ognahay in aannaan hal mar ku xallin karaynin dhammaan dhibaatooyinka Soomaaliya haysta, kaliya annaga oo talooyin dhawr ah uun bixinayna. Waxa aannu ognahay in ay tahay mashruuc muddo dheer qaadanaya, mana fududa in si dhib yar dib loogu dhiso bulsho soo martay in ka badan labaatan sano oo rabshado iyo xasilooni darro ah." sidaas ayey qoreen, iyaga oo intaas ku daray, "haddii la joogteeyo habsamisocodka Wadahadallada Qaranka ee Dibuhabeynta Caddaaladda, waxa uu noqon karaa isbeddel dhab ah iyo yool bartimaameed u ah taariikhda Soomaaliya. Si ay dadka Soomaaliyeed dalkooda dib ugu dhistaan waxayaalaha ka caawinaya waxa ka mid ah dib u soo celinta kalsoonida ay ku qabaan awooddooda. Kaalmada caalamiga ah waxa ay door muhiim ah ka qaadan doontaa dedaalka loogu jiro arrintan, balse waxa ay guuleysan doontaa oo keliya haddii Soomaalida lafteedu ay ula tacaalaan caqabadaha soo foodsaara si ruuxi ah."[26]

---

23 Qalinle, A. iyo Haji, H., "Wadahadal-Qarameedkii Soomaaliya ee ku saabsanaa dibuhabeynta caddaaladda: Barbilowga cusub ee Soomaaliya". (2013). Hiiraan Online. Ee laga galo:https://hiiraan.com/op4/2013/apr/29058/national_dialogue_on_justice_reform_a_new_beginning_in_somalia.aspx
24 Warmurtiyeedka "Wadahadal-Qarameedkii Soomaaliya ee Dibuhabeynta Caddaaladda". (2013). Ee laga galo: http://hrlibrary.umn.edu/research/somalia-justice-reform.html
25 Mid ka mid ah qabanqaabiyaasha, waxa uu ahaa Xasan Xaaji, oo noqday wasiirka caddaaladda laga bilaabo Abriil 2017- Sibteenbar 2020.
26 Qalinle, A. and Haji, H. Ibid.

## 4.3 Dibuhabeynta awoodda Caddaaladda

Isla markii uu dhammaaday shirkii dib u eegista caddaaladdu, maamulkii Xasan Shiikh, isaga oo adeegsanaya la taliyeyaashiisa qaybta siyaasadda saamaynta ku leh, waxa uu bilaabay in uu diyaariyo sharciyo fara badan oo loogu talogalay golaha wasiirradu in ay u gudbiyaan golaha sharci-dajinta. Qaar badan oo ka mid ah sharciyadaasi waxa ay waafaqsanaayeen talooyinka shirka.Laakiin waxa xayiray xiisadda sii kordheysa ee u dhaxeysa madaxweynaha iyo raysalwasaarihiisa Cabdi Faarax Shirdoon "Saa'id". Markii ay ahayd Diisanbar 2013, xiisadda u dhaxeysa labadooda waxa ay gaartay heerkii ugu kululaa , taas oo horseedday in ay dalab madaxweynaha ka yimi dartii baarlamanku xilka kaga xayuubiyeen raysalwasaaraha.[27]

Horraantii sannadkii 2014, ayaa la magacaabay raysalwasaare cusub, sida oo kale na Faarax Sheekh Cabdulqaadir, oo ahaa lataliye saameyn ku leh madaxweynaha ayaa loo magacaabay wasiirka caddaaladda. Marka la eego saameynta uu ku yeeshay daneeyeyaasha muhiimka ah ee DFS, Cabdulqaadir waxa uu si dhaqso leh ugu dhaqaaqay in uu gaaro qaar ka mid ah ujeeddooyinkii laga lahaa shirkii dibuhabeynta caddaaladda (oo uu sida oo kalena abaabulkiisa gacan ku lahaa). Dhawr bilood gudahood, waxa uu baarlamaanka ka ansixiyey hirgelinta golaha cusub ee Adeegga Garsoorka. Baarlamaanka oo aad ugu kala qeybsamay ayaa ansixiyay sharciga. kalfadhigii golaha sharci-dajinta ee qabsoomay 8 Julay 2014 waxa ka soo xaadiray 147 mudane[28], waxa u codeeyay ansixinta golaha adeegga garsoorka 79 kaliya, waxa aana diiday 59, halka ay ka aamuseen 9 xildhibaan. In kasta oo ansixinta sharciga laftiisa loo arkayey guul weyn oo u soo hoyatay Wasaaradda Caddaaladda (MoJ), arrinta sidan fudud sharciga loo hordhigay ee lagu ansixiyay waxa ay shaki galisay bulshada sharci-yaqaanka ah ee dalka joogta oo dhan, taas oo rajeyneysay in xaajada si ballaaran bulshada loo dhexdhigo, iyada oo kaalinta ugu muhiimsan ee udub-dhexaadka ah ay yeelanayso laanta garsoorku.

### Nidaamka lagu dhisayo Golaha Adeegga Garsoorka

Laba qaab-dhismeed oo sharci ah ayaa tilmaamaya geeddi-socodka kakan ee lagu aasaasayo Golaha Adeegga Garsoorka, kuwaas oo la aamminsan yahay in uu garsoorku yahay hay'adda ugu muhiimsan. Sharciga kowaad, oo ah qodobka 109A ee dastuurka, waxa uu go'aaminayaa tirada Golaha Adeegga Garsoorka, meesha ay ka imanayaan iyo sida xubin walba loo magacaabayo. Guddoomiyeyaasha maxakamadda sare iyo maxakamadda dastuurka (hadda ma jirto) iyo sida oo kale xeer-ilaaliyaha guud iyo guddoomiyaha guddida xuquuqal insaanka (hadda ma jiro) ayaa ah xubnaha ugu muhiimsan ee xudunta ah. Ururka Garyaqaanka Soomaaliyeed (SLC) waxa laga rabaa in uu soo magacaabo labo qof oo ka mid ah golahooda iyo in ay golaha wasiirradu soo xulaan saddex qof "oo aan la isku khilaafsanayn". Si madmadow leh ayaa uu qodobka 109A (4) waxa uu u shegayaa in uu muddo-xileedka Golaha Adeegga Garsoorku noqonayo shan sano, halka labada qof ee ka imanaya Ururka Garyaqaanka Soomaaliyeed iyo saddexda qof ee madaxabannaani ay ka haystaan muddo-xileed afar sano ah. Maqnaanshaha maxakamadda dastuurka iyo Guddida Xuquuqal insaanka, iyo waliba madmadowga ku jira sharci-ahaanshaha Ururka Garyaqaanka Soomaaliyeed, ayaa waxa ay mugdi galiyeen oo jaahwareeray gabi ahaan geeddi-socodka caddaaladda.

---

27 Hussein, A. & Taxta, I. "Xildhibaannadii u codeeyey Raysalwasaaraha Soomaaliya". (2013). Reuters. Halkan ka gal: https://uk.reuters.com/article/uk-somalia-politics/somali-prime-minister-voted-out-by-lawmakers- idUK-BRE9B10ML20131202

28 Kooramka ugu yar ee baarlamaanku waa 50% +1, oo dhan 138. Ma kala cadda in ay ahayd arrin toos u muuqatay iyo in ay ahayd loollan baarlamaan haddiiba uu kooramkii ugu tirada yaraa uu soo xaadiray, si loo dedejiyo gudbinta dharciga muranka dhaliyey.

Iyada oo la tix-raacayo qodobbada 109A iyo 111A ee dastuurka, sharciga cusubi waxa uu siiyay wasaaradda caddaaladda awoodo aad u fara badan oo lagu soo xulayo sagaalka xubnood ee golaha adeegga garsoorka, si markiiba loo raadiyo turxaan bixinta iyo ansaxinta golaha wasiirrada, ka hor inta aan loo celin baarlamaanka federaalka si loo kala shaandheeyo musharraxiinta iyo si loo waafajiyo qiimaynta kama dambaysta ah. Qodobka labaad ee sharcigu, waxa uu si aan gabbasho lahayn u sheegayaa in golaha adeegga garsoorku ka madax-bannaan yahay hay'adaha fulinta iyo sharci dejinta. Qodobka shanaad, waxa uu qeexayaa awoodaha badan ee golaha adeegga garsoorka, oo ay ku jiraan shaqaalaynta, ruqseynta iyo dejinta hannaanka maamulka ee maxakamadaha federaalka iyo maxakamadda dastuuriga ah.

> *Laakiin meelmarinta sharcigu waxa ay dhalisay xaalad qadhaadh, waxaana is abaabuley xoogag siyaasadeed oo kala jaadjaad ah, kuwaas oo dhammaantood ku sugnaa Muqdisho*

Laakiin meelmarinta sharcigu waxa ay dhalisay xaalad qadhaadh, waxaana is abaabuley xoogag siyaasadeed oo kala jaadjaad ah, kuwaas oo dhammaantood ku sugnaa Muqdisho. Qaar ka mid ah siyaasiyiinta ka soo jeeda qabiilka ugu badan laanta garsoorka, oo ah Dir, ayaa arrintaas ka biyo-diiday, una arkay halis ku soo fool leh, waxa aanay dedaallada loogu jiro isku-shaandhaynta guddidaas u maleeyeen dibinno loo qoolayo iyo ajandeyaal qarsoodi ah oo ay waddo wasaaradda caddaaladdu, sidaa darteed waxa ay go'aansadeen dagaal ka dhan ah dedaalladaas.[29] Waxa la aamminsanaa in uu Ilkaxanaf yahay nin beeshiisa u abaabulaya kuraasta golaha wasiirrada iyo golaha baarlamaanka, si looga hortago in ay golaha adeegga garsoorku waligeed dhisanto, maxaa yeelay sharciga cusubi waxa uu golahna siinayaa awoodo badan oo ay ka midyihiin in ay shaqaalaysiiyaan ama ay shaqada ka eryaan garsoorayaasha, iyo in ay kormeeraan shaqada guddoomiyaha maxakamadda sare- taas oo ah wax aanu Ilkoxanaf waligii arkin.[30] Haddii aynnu si kale u dhigno, Ilkaxanaf iyo xubnaha beeshiisu waxa ay dareemeen in bariiskooda laga ciidaynayo,caanahoodana la hoosgaynayo awoodda wasaaradda caddaaladda, oo uu wasiir ka ahaa nin ka soo jeeday beel waxoogaa ka awood badnayd, aadna ugu ag dhawayd oo xulufo la ahayd Madaxweyne Xasan Sheekh.

> *Kooxaha kale, waxa aad u handiday waxyaabaha ay u arkeen in ay yihiin hubayn ay madaxweyne Xasan Shiikh iyo xulufadiisu ku samaynayaan nidaamka caddaaladda*

Kooxaha kale, waxa aad u handiday waxyaabaha ay u arkeen in ay yihiin hubayn ay madaxweyne Xasan Shiikh iyo xulufadiisu ku samaynayaan nidaamka caddaaladda.[31] Xitaa qaar ka mid ah bulshada caalamka ayaa si aan dheellitirnayn u maalgeliyay nidaamka caddaaladda, waxa aanay ka walwalsanaayeen wixii ay u arkayeen koox Islaamiyiin ah oo ka jirta Villa Soomaaliya[32], kuwaas oo huwanaa awoodda dawladda in ay u halgamaan nidaamka caddaaladda cusub ee dalku in uu u jihaysto nidaam-dhaqameedka Soomaalida, kana go'o saamaynta reer galbeedka.[33] Kooxahani laba jeer ayey isku biireen, waxa aanay laba goor ka codeeyeen magacyo uu u soo gudbiyey Cabdulqaadir golaha cusub ee adeegga garsoorka. Qorshaha dibuhabeeynta ee uu watay wasiirku, isaga oo aan wali xataa gaadhin golaha baarlamaanka ayaa uu ku sii dhintay jidka.

29 Wareysi lala yeeshay xildhibaan hore iyo xubin ka tirsan guddida garsoorka (Nofeembar 2020).
30 Ibid.
31 Wareysi lala yeeshay wasiirkii hore ee caddaaladda Faarax Cabdulqaadir (Nofeembar 2020).
32 Cabdulqaadir iyo Madaxweyne Xasan Sheekh ayaa la sheegay in ay ka tirsan yihiin "Dammujadiid", oo ah koox qunyar socod ah, oo Islaamiyiin ah, kuwaas oo caan ku ah howlaha samafalka ee dhinacyada waxbarashada iyo caafimaadka.
33 Wareysi lala yeeshay Xildhibaan hore oo xubinna ka ah guddida garsoorka. Ibid.

Bishii Sibteenbar 2014, laba bilood uun ka dib markii sharciga loo gudbiyey golaha adeegga garsoorka ee uu golaha sharci-dajintu ansixiyey, todobaadyo gudahoodna uu golaha fulintu diiday magacyadii ay u soo gudbisay wasaaradda caddaaladdu, ayaa uu raysaywasaare Cabdiwali Shiikh Axmed si lama filaan ah xilka uga qaaday Cabdulqaadir oo ahaa wasiirka wasaaradda caddaaladda, waxa aanu ku beddelay siyaasi ruugcaddaa ah, Saalim Caliyow Ibrow, oo ahaa xulufada ay aadka isugu dhaw yihiin guddoomiyaha golaha sharci-dajinta Maxamed Cismaan Jawaari. Isku shaandheynta lagu sameeyey golaha wasiirrada, waxa ay argagax gelisay jawiga siyaasadeed ee dalka, gaar ahaan Cabdulqaadir ayaa loo arkayey in uu yahay lama taabtaan, iyada oo loo sababaynayey xiriirka dhow ee uu la leeyahay madaxweynaha. Cabdulqaadir ayaa ku dooday in xilka-qaadistiisu ahayd ololе si wanaagsan la isugu dubbariday oo ay sameeyeen daneeyayaal kala duwani, iyaga oo ujeeddada kaliya ee ay ka lahaayeen ahayd in lagu wiiqo qorshihiisa isbeddel doonka ah.[34] Murankii ka dhashay isku shaandheyntii lagu sameeyey golaha wasiirada ayaa horseeday in horraantii 2015, xilka laga qaado raysalwasaare Ahmed, laguna beddelo Cumar A. Sharma-Arke.

Raysalwasaarihii cusbaa ee Cumar A. Sharma-Arke, ayaa wasiir cusub u magacaabay wasaaradda caddaaladda. Cabdullaahi Axmed Jaamac( Ilkajiir) oo hore u ahaa sarkaal, wasiirna ka soo noqday Puntland looma tixgalinnin mudnaantiisa. Haseyeeshe, golohii sharci-dajinta ee sagaalaad ayaa diiday liis magacyo ah oo ahaa golaha adeegga garsoorka sannadkii 2016, iyada oo loo cuskaday in ay wasaaradda caddaaladdu soo gudbisay in la kala shaandheeyo shan qof oo kaliya, oo ka mid ah sagaalkii xubnood ee uu ka golaha adeegga garsoorku koobnaa, dalkuna in uu galay xiisad doorasho.[35] Khubaradu waxa ay sheegtay in hannaanka lagu qeexay qodobka 109B ee dastuurka uu yahay mid jaahwareersan, kaas oo qeexaya magacaabista sagaal xubnood oo golaha adeegga garsoorka ah, in in kasta oo ay afar ka mid ahi xubno ka yihiin hay'adaha kale ee garsoorka. "Waxa aannu ku talineynaa in la dajiyo hannaan kumeelgaar ah, si loo sameeyo magacaabis cusub. Haddaba si loo yagleelo hay'adaha kale ee xiriirka la leh, waxa la sameyn doonaa golaha ageegga garsoorka si ay u magacaabaan garsoorka hoose, "ayaa uu yiri Aadan Shirwac Jaamac, oo ahaa agaasimaha dalka ee Hay'adda Sharciga Horumarinta Caalamiga ah (IDLO). [36]

> *Waxa la yaab leh, 17 kii Noofember 2020 waxa uu baarlamaankii tobnaad ansixiyay oo kaliya shan xubnood oo ka tirsan Golaha adeegga garsoorka*

Waxa la yaab leh, 17 kii Noofember 2020 waxa uu baarlamaankii tobnaad ansixiyay oo kaliya shan xubnood oo ka tirsan Golaha adeegga garsoorka, tani waxa ay timi ku dhowaad afar sano ka dib markii baarlamaankii 9-aad uu diiday liis la mid ah,[37] isla kan hadda la ansixiyey, waxa aanu jawiga siyaasadeed ee waddanku ku dhow yahay mid la mid ah kii 2016. Soomaaliya waxa ay hadda doonaysaa in ay gasho doorasho aad loogu loollamayo, isbahaysiga talada haya iyo kuwa mucaaradka ah ayaa ay labadooduba kula dagaallamayaan baarlamaanka in uu arrin kasta dhinacooda ka noqdo.

---

34 Wareysi lala yeeshay wasiirkii hore ee caddaaladda, Cabdulqaadir. Ibid.
35 SBC "Baarlamaanka Soomaaliya oo Dib u Celiyey Golaha Adeegga Garsoorka". (2016). Halkan ka gal: https://allsbc.com/baarlamaanka-somaliya-oo-dib-u-celiyay-golaha-adeega-garsoorka/
36 Wareysi lala yeeshay Adam S. Jama oo ah IDLO. (Nofeembar 2020). Muqdisho.
37 Kaliya 140 mudane ayaa xaadiray kooramka,kuwaas oo ka badan laba-meelood kooramka ugu yar, dhammaantoodna waa ay u codeeyeen.

Waxa kale oo walwal badan ku haya laanta garsoorka, magacyada xubnaha golaha adeegga garsoorka ee uu ansaxiyey golaha baarlamaanku, kuwaas oo loo gudbiyey markii horena ay taageereen golahii wasiirrada ee xilka sii hayey, ka dib markii ay kalsoonida kala laabteen ibaarlamaanku. Ururada bulshada rayidka ah ee ugu cadcad dalka ayaa dhaleeceeyay tallaabadan, iyaga oo xusay in "golaha adeegga garsoorku yahay aasaaska nidaamka caddaaladda Soomaaliya."[38] Wasaaradda Caddaaladdu, waxa ay gudbisay magacyada afar xubnood oo kale, maxaa yeelay xubinnimadooda waxa si toos ah loogu muujiyey doorka ay ka ciyaaraan (madaxda garsoorayaasha maxakamadda sare iyo maxakamadda dastuurka, xeer-ilaaliyaha guud iyo guddoomiyaha Guddida Xuquuqal insaanka). Guddida xuquuqal insaanku may jirin 2016 ( hadda oo ay 2020 tahay na ma jirto ).

## 5. Madmadowga Qaab-dhismeedka Sharciga

*"maxakamadaha shanta dowlad-goboleed ee xubnaha ka ah dowladda federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir (MGB) waxa ay qaateen qaabab kala duwan oo la jaanqaadaya xaqiiqooyinkooda siyaasadeed*

Dabacsanaanta iyo madmadowga ku jira Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya (DKS) ayaa ah qodobbada aasaasiga ah ee dhaliyey caqabadaha faraha badan ee lidka ku ah qaab-dhismeedka nidaamka caddaaladda. Qodobka 105 (2) waxa uu leeyahay "qaab-dhismeedka garsoorka waxa nidaaminaya sharci baarlamaanku soo saaray."[39] Iyada oo ay ka danbaysay muddo siddeed sano ahi markii la diyaariyey dastuurka, hadda wali baarlamaanka federaalku may soo saarin sharciyo kala caddeynaya qaab-dhismeedka saxda ah ee laanta garsoorka, gaar ahaan marka loo fiiriyo nidaamka federaalka. Maaddaama aanu jirin sharcigaas muhiimka ahi, maxakamadaha shanta dowlad-goboleed ee xubnaha ka ah dowladda federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir (MGB) waxa ay qaateen qaabab kala duwan oo la jaanqaadaya xaqiiqooyinkooda siyaasadeed.

Intooda ban, shanta dowladood ee xubnaha ka ah fadderaalka iyo Banaadir waxa ay adeegsadaan nidaam garsoor oo ka kooban saddex heer, kaas oo laga dhaxlay taliskii Siyaad Barre. Maxakamadda Darajada Koowaad waxa ay badanaa ku taal maamulka ugu hooseeya, taas oo ah heer degmo. Dowlad-goboleedyada badankooda, waxa ay Maxakamadda Darajada Koowaad la macaamishaa kiisaska caadiga ah ee dembiyada madaniga ah iyo kuwa fudud. Tan waxa ka sarreeya Maxakamadda Rafcaanka, oo sida caadiga ah ku taalla caasimadda gobalka (dowlad goboleedka). Maxakamaddani waxa ay wax ka qabataa kiisaska culculus ee ay soo gudbiso Maxakamadda Darajada Koowaad- sababta ay u soo gudbisaana waa in ay awooddeeda ka baxsan yihiin miisaanka iyo baaxadda danbiyadu. Darajooyinkan figta ugu sarraysaa waa Maxakamadda Sare, oo ah heerka ugu sarreeya maxakamadaha dalka. Waxyaabaha ay xukunto waxa ka mid ah dambiyada culculus (sida kiisaska ciqaabta dilka iyo kufsiga), waxa aanay u shaqaysaa sida maxakamadda dastuuriga ah ee heer qaran,waa marka uu jiro khilaaf u dhaxeeya hay'adaha dowladdu.[40]


---

38 BBC Somali "Maxaa walaac looga muujinayaa xubnaha Golaha Adeegga Garsoorka Soomaaliya". (2020). Halkaan ka gal: https://www.bbc.com/somali/war-53619526

39 Eeg dastuurka kumeelgaarka ah ee Soomaaliya. (2012). Halkan ka gal : http://hrlibrary.umn.edu/research/Somalia- Constitution2012.pdf

40 Wareysiyada Puntland, Jubbaland, koonfur galbeed, Galmudug iyo saraakiisha caddaaladda Banaadir. (Sibteenbar-- Oktoobar 2020).

## Saddexda Heer ee Maxakamadaha




## 5.1 Aasaasidda Maxakamadda Dastuuriga ah

> “
> *Intooda badan dadkii aannu warbixintan ku waraysannay waxa ay isku raaceen in madaxweyneyaashu ka faa'iidaystaan goldaloolooyinka sharciga, iyaga oo ka cararaya in ay isku soo jeediyaan xaq ka sii jeedda*

Marka laga hadlayo laamaha garsoorka dalka, waxa qodobbada ugu qallafsan ka mid ah dhisitaanka maxakamadda dastuuriga ah ee Soomaaliya. Waxa jira laba sababood oo kala ah, mid sharci iyo mid siyaasadeed, waana halka sartu ka qudhuntay ee ay arrintani siddeed sano oo uu dastuurku dhaqangal ahaa u fuliwayday. Xagga sharciga, dastuurka ayaa isburinaya, marka la joogo hannaanka magacaabidda guddoomiyaha maxakamadda dastuuriga ah. Dastuurka qodobkiisa 90(J) ayaa si cad madaxwaynaha u siinayaa awoodda magacaabista guddoomiyaha maxakamadda Dastuuriga ah. Hayeeshee, qodobka 105 (b)5 ayaa isna awood u siinaya in ay garsoorayaasha maxakamadda tastuurku iska dhex doortaan guddoomiyaha maxakamadda iyo ku xigeenkiisaba. In ay isburintaasi tahay mid ku talogal ah iyo in ay tahay mid kamma ah, ma kala cadda. Hayeeshee, arrintani waxa ay si ku habboon ugu shaqeysay madaxweynayaashii is xigxigay, kuwaas oo necbaa Maxakamadda Dastuuriga ah, maxaa yeelay, waa maxakamadda kaliya ee sharciga ah ee dacwad ka gudbin karta xil ka qaadista madaxweynaha dalka. Intooda badan dadkii aannu warbixintan ku waraysannay waxa ay isku raaceen in madaxweyneyaashu ka faa'iidaystaan goldaloolooyinka sharciga, iyaga oo ka cararaya in ay isku soo jeediyaan xaq ka sii jeedda.[41]

41 Wareysi lala yeeshay xeer-ilaaliyihii guud ee hore, wasiirkii hore ee caddaaladda iyo kuwa kale. Ibid.

Sida ku xusan Dastuurka, dhisidda Golaha Adeegga Garsoorka iyo Maxakamadda Dastuuriga ahi, waa tallaabada kaliya ee ka dhiman in la abuuro garsoor xooggan oo madax-bannaan. Laakiin si fudud loogama gudbi karo jidgooyooyinka sharci iyo kuwa siyaasadeed ee arrintan hor yaalla. Ururro caalami ah oo dawladda Soomaaliya ka caawiya horumarinta Dastuurka ayaa soo jeediyay in la sameeyo qorshe iyo hab isku tanaasul ku dhisan oo mashaqadan lagu xalliyo. Waxa ay ku doodeen in qodobka 90(J) iyo kan 109 (b)5 la mideeyo, iyada oo loo marayo dibu-eegis Dastuurka lagu sameynayo. Balse ilaa iyo hadda, "dariiqa ugu maaquulsan ee lagu gaadhayaa, waa in marka hore Golaha Shacabku magacaabo Maxakadda Dastuurka iyo Maxakamadda Sare. Haddii heshiis noocan ah madaxweynaha lala gaadho, waxa la samayn karaa magacaabis kumeelgaar ah, iyada oo sicad loo qeexayo in ay shaqayn doonaan oo kaliya inta dibu-eegista Dastuurka iyo hirgalintiisa laga dhamaystirayo. Hannaankan ayaannu ku talinaynaa, waana habka kaliya ee ogolaanaya in hawshu socoto, laguna gaari karo in la dhiso golaha adeegga garsoorka, iyada oo la raacayo qodobbada Dastuurka."[42]

Sabab kale, oo ay aasaasidda maxakamadda Dastuuriga ahi muhiim u tahay waa baahida loo qabo helidda hannaan lagu xalliyo khilaafaadka dhex mara dawladda fadaraalka iyo maamullada xubnaha ka ah. Sida uu sheegay Professor Cheryl Saunders, oo bare ka ah Jaamacadda Melbourne , "Dawlad kasta oo fadaraal ahi, waxa ay u baahantahay hay'ad dhexdhexaad ah, si ay u xalliso khilaafaadka soo kala dhex gala dawladda fadderaalka iyo dawlad-goboleedyada hoos yimaadda. Hay'addaasina waa in ay noqotaa mid madax-bannaan si ay dhinacyadu ugu kalsoonaadaan. Waana in ay yeelataa awood ay ku gaari karto go'aan dastuuri ah, oo ka dhan ah dhinacyada is haya, ha ahaato dawladda dhexe ama maamullada iyo gobollada hoos yimaadda 'e. "[43]

> *Marka dib loo halacsado taariikhda, markasta oo xiisad dastuuri ahi timaaddo, Maxakamadda Sare waxa loo beddeli jiray maxakamad dastuuri ah, iyada oo lagu darayo afar qof oo kursigeeda ku habboon*

Marka xaqiiqada la abbaaro xukuumadda hadda jirta ee uu hoggaaminayo Madaxweyne Farmaajo, waxa ay golaha adeegga garsoorka ugu gudbisay golaheeda wasiirada iyo golaha sharci-dajinta qaab sharci ahaanteeda su'aalo laga keenay. Iyada oo la filayo in muddo-xileedkii madaxweynuhu dhammaad ku dhawyahay, maaquul ma aha in madaxweynuhu ku talaabsan doono dhismaha maxakamad dastuuri ah, xilli uu sii dhammaanayo muddo xileedkiisi. Khubarada qaar waxa ay rumeysan yihiin, maaddaama ay maqantahay maxakamaddii Dastuuriga ahayd in Maxakamadda Sare ay u dhaqanto sidii maxakamad dastuuri ah, oo la mid ah sidii ay ahaan jirtay 1960-naadkii. Marka dib loo halacsado taariikhda, markasta oo xiisad dastuuri ahi timaaddo, Maxakamadda Sare waxa loo beddeli jiray maxakamad dastuuri ah, iyada oo lagu darayo afar qof oo kursigeeda ku habboon.[44] Labo qof oo ka mid ah waxaa hubin jiray oo magacaabi jiray golaha baarlamaanka, kuwa kalena waxaa magacaabi jiray madaxwaynaha. Guddoomiyihii hore ee baarlamaanka federaalka, Maxamed Cismaan "Jawaari", oo ah aqoonyahan si weyn loogu tixgalliyo cilmiga sharciga kana mid ah qoreyaasha dastuurka, ayaa ku doodaya in mabaadiida "Awood ku bannaysashada" halkan lagu dabbakho, taasina waa in ay jirto inta laga aasaasayo maxakamad dastuuri ah. Kaalintaasna waa in ay buuxisaa oo ay door muhiim ah ka ciyaartaa maxakamadda sare inta la dhisayo maxakamad dastuuri ah, "maxaa yeelay, xilligan la joogo, muwaaddiniintu ma laha awood dastuuri ah oo ay kaga horyimaaddaan sharciyada uu baarlamaanku ansixiyo, taas oo ah xuquuq aasaasi ah." [45]

---

42 Wareysigii Mr. Jama, oo ah sarkaal ka tirsan IDLO. Ibid.
43 Saunders, C., "Maxakamadaha ku yaalla Dalalka Federaalka ah" ee IDEA. (2019). Halkan ka gal: https://www.idea.int/sites/default/files/publications/courts-in-federal-countries.pdf
44 Wareysi aan la yeelannay guddoomiyihii hore ee baarlamaanka Jawaari. Ibid.
45 Ibid.

## 5.2 Badashada shuruucda

> **"**
> *Sharciyadan badani waxa ay u fiican yihiin dadka , taas oo u horseedaysa bulshada in ay u caddaalad doontaan nidaamka ay dantooda ka dhex arkaan, kaas oo ay ka heli karaan jawaabta ay jecel yihiin*

Dawlad-goboleed kastaa waxa ay leedahay dastuur u goonni ah, kaas oo qodobaynaya nidaamka caddaaladdiisa, iyo sharciyo tilmaamaya qaabka loo raacayo dambiyada ciqaabta. Dawlad- goboleed kastaa waxa uu leeyahay wasaarad caddaaladeed, xeer-ilaaliye guud iyo maxakamado tiro badan oo kala xukunno duduwan. Dawlad-goboleedyada qaar ayaa shuruucda ku horumarsan, laakiin dawlad-goboleedyada daraasadda laga sameeyey waxa ay maxakamadahooda sharciga ahi ku dhaqmaan shuruuc aan isku aaddanayn oo laga kala keeney shuruucda Ingiriiska,Talyaaniga, Shareecada Islaamka iyo Xeer-dhaqameedka Soomaalida. Sharciyadan badani waxa ay u fiican yihiin dadka , taas oo u horseedaysa bulshada in ay u caddaalad doontaan nidaamka ay dantooda ka dhex arkaan, kaas oo ay ka heli karaan jawaabta ay jecel yihiin.

Qaar ka mid ah dawlad-goboleedyada, sida Puntland ayaa horumar ka fiican kuwa kale ka samaysay shuruucdooda hoose, waxa aanay xaqiijiyeen joogtaynta iyo isku xirnaanta qaybaha maxakamadahooda. Kuwo kale, sida Galmudug iyo Hirshabeelle, aad ayey ugu dambeeyaan in ay dastuuri ka dhigaan nidaamkooda caddaaladda. Run ahaantii madaxwaynaha Galmudug, waxa kaliya oo uu magacaabay guddoomiye maxakamad sare bishii agoosto 2020, [46] lix bilood kadib markii la doortay. Maxakamadda sare ee Galmudug malaha xafiis, sida aanay maxakamadaheeda kale ba u lahayn xafiisyo.


Sida ku cad daraasaddeenan ma jirto dawlad-goboleed xil iska saartay in ay mideyso dastuurkeeda iyo kan federaalka, si loo hubiyo isku dheellitirnaanta nidaamka caddaaladda. Intooda badani, waxa ay ku marmarsoonayaan in ay sugayaan inta uu dhammaanayo dastuurka dibu-eegista ku jiraa. Dastuurka Puntland waa uu ka horreeyey kan federaalka, balse dhammaan dawlad-goboleedyada kale waxa la aasaasay wixii ka danbeeyey 2013, xilligani waa uun hal sano kadib markii dastuurka federaalka la dhaqangaliyey. Nidaamka caddaaladda gobolada ayaa ah kaalinta ay saxitaankeeda muwaaddiniintu sida weyn u dareemayaan.

## 5.3. Kala go'a mareegta caddaaladda

Maamullada badankoodu, sida nidaamka federaalka, mareegta caddaaladdu waxa ay ka koobantahay bilayska, dacwaad-qaadista (sida xafiiska xeer ilaaliyaha guud), ururka qareennada maxalliga ah, maxkamadaha sharciga, laanta sixitaanka iyo wasaaradda caddaaladda ee gobolka.

---

46 Goobjoog: "Madaxweyne Qooqoor oo Magacaabay Guddoomiyaha Maxakamadda Sare ee Galmudug". (2020). Halkan ka gal: https://goobjoog.com/madaxweyne-qoorqoor-oo-magacaabay-guddoomiyaha-maxka-madda-sare-ee-galmudug/




> Ugu yaraan waxa jira wadashaqayn ka dhexaysa bilayska marka laga hadlaayo hababka caadiga ah ee hawlgalka bilayska, xeer ilaaalinta, maxakamadaha, laanta sixitaanka iyo wasaaradda caddaaladda

In kasta oo mareegtu qaab siman u wada shaqeyso, haddana waxa jira isku-dar yar oo ka jira meelaha iskaashiga aad muhiimka ugu ah, kuwaas oo si kala sarraysa u wada shaqeeya.Ficil ahaan, taasi waxa ay ka dhigan tahay in eedaysane ku jira gacanta bilayska ay u badan tahay in la maxakamadeeyo lana geeyo maxakamad maxalli ah, isaga oo uu la socdo qareenkiisu.[47] Haddii la xukumo,waxa suurogal ah in eedaysanuhu xabsiga gobolka ku dhammaysto, iyada oo ay kormeerayso wasaaradda cadaaladda ee maxalliga ahi. Si kastaba ha ahaatee, ugu yaraan waxa jira wadashaqayn ka dhexaysa bilayska marka laga hadlaayo hababka caadiga ah ee hawlgalka bilayska, xeer ilaaalinta, maxakamadaha, laanta sixitaanka iyo wasaaradda caddaaladda. Hal danbiile, ayaa waxa siyaabo gabi ahaanba kala duwan danbi ugu oogi kara laba degmo oo kala gaar ah, garsooreyaal badanina waxa ay si fiiro gaaban u adeegsadaan (oo u turjumaan) sharciyada maxalliga ah.[48]


Weli waxa ay maxakamadaha dalku sannad walba fuliyaan kumannaan dacwadood oo madini ah iyo dacwad ciqaabeedyo. Shaxankan hoose waxa uu sheegayaa dacwadaha ay fuliyeen maxakamadaha dawladda federaalka iyo dawlad-goboleedyadu sannadkii 2019.[49]

47 Waraysi lala yeeshay xeer-ilaaliyihii hore ee Soomaaliya. Ibid.
48 Ibid.
49 Eeg "Warbixin ku saabsan Caddaaladda Qaranka ee 2019".

| Maxakamadda | Dacwad madani ah | Dacwad ciqaabeed | Dacwad Maamul | Guud ahaan |
|---|---|---|---|---|
| Maxkamadda Sare | 78 | 8 | 5 | 91 |
| Benadir (16 maxakamado) | 1667 | 756 | | 2423 |
| Puntland (34 maxakamado) | 4705 | 2430 | | 7135 |
| Jubbaland (5 maxakamado) | 787 | 349 | | 1136 |
| Southwest (14 maxakamado) | 425 | 249 | | 674 |
| Galmudug (4 maxakamado) | 1930 | 249 | | 2179 |
| Hirshabeele (12 maxakamado) | 1501 | 437 | | 1938 |

# 6. Federaalaynta nidaamka caddaaladda

In kasta oo ay Soomaaliya si rasmi ah u qaadatay dawladnimada nidaamka federaalka sannadkii 2004, dhaqangalinta nidaamkaasi waa shaqo aan wali fari ka qodnayn. Marka la eego dhammaan qeybaha kala duduwan ee nidaamka federaalka, nidaamka caddaaladdu, waa ka ugu kala daadsan dalka, gobollada iyo xitaa degmooyinka. Baarlamaanka federaalku weli may soo saarin sharciyo si rasmi ah u fedderaalaynaya laanta garsoorka, iyada oo la waafajinayo qodobka 105 (2) ee dastuurka. Tani waa ka qayb arrinta, maxaa yeelay baarlamaanka ayaa u kuur gala geeddi- socodka dib-u-eegista dastuurka, kaas oo loogu talagalay in uu soo jeediyo odorosyada siyaasadeed ee ay xildhibaannadu go'aamiyaan. Ka dib sannado badan oo daraasado dhammaystiran la samaynayey, Guddiga Madaxa-bannaan ee Dibu-eegista Dastuurku, waxa ay soo jeediyeen liis ay ku qoran yihiin saddex qaab oo caan ka ah adduunka oo dhan, gaar ahaan dalalka federaalka ah.[50] Saddexda nooc ayaa kala ah:




50 Wareysi lala yeelashay gudoomiyihii hore ee baarlamaanka Jawaari. Ibid.
51 Saunders, C. IDEA. Ibid.
52 Si aad uga bogoto xog faahfaahsan, Fadlan eeg warqada IDEA ee kor ku xusan.

In kasta oo aanay Guddida madaxa-bannaan ee Dibu-eegista iyo Hirgelinta Dastuurku, midna mid ka doorbidin xulashooyinkan, dastuurka ayaa ay aad ugu caddahay arrintani. Qodobka 108 waxa uu qeexayaa in ay jiraan saddex heer oo maxakamado ahi: "(a) Maxakamadda Dastuuriga ah. (b) Maxakamadaha heer Federaal. (c) Maxakamadaha heerka Dawlad-goboleed. " Waxa uu intaa ku darayaa in ay maxakamadda ugu sarreysaa tahay maxakamadda sare ee heerka DFS,iyo in dawlad-goboleedyadu ay yeelanayaan maxakamado sare oo u gaar ah.[53]

## 6.1. Waa noocma Hannaanka Caddaaladeed ee ku habboon Soomaaliya?

*"Xilligii aannu ku gudo jirnay xog ururintan, qof qudhi nooma uu soo bandhigin hal nooc oo nidaam maxakamadeed ah, kaas oo ay dawladda dhexe ee Muqdisho wax ku maamusho. Dhammaan la waraystayaashu waa ay tabayeen hannaankaas, maaddaama oo ay la xidhiidho dareenno xooggan oo ku salaysan kalitaliyihii Siyaad Barre*

Xilligii aannu ku gudo jirnay xog ururintan, qof qudhi nooma uu soo bandhigin hal nooc oo nidaam maxakamadeed ah, kaas oo ay dawladda dhexe ee Muqdisho wax ku maamusho. Dhammaan la waraystayaashu waa ay tabayeen hannaankaas, maaddaama oo ay la xidhiidho dareenno xooggan oo ku salaysan kalitaliyihii Siyaad Barre.

Si kastaba ha ahaatee, saraakiisha garsoorka ee dawladaha xubnaha ka ah fadderaalka, kuwaas oo aannu ku waraysannay daraasaddan ayaa si adag ugu dooday in la helo nidaamka garsoorka ee isbarbar-socda (dual court system), iyada oo la raacayo qodobka 108. Waxa ay ku doodayaan in marka lagu daro dastuurka kumeelgaarka ah, oo ay aragti ahaan qabaan in aanu shaki ku jirin, ay xaqiiqadu tahay in wixii ka danbeeyey dagaalladii sokeeye ay Soomaaliya u baahan tahay nidaamyo caddaaladeed oo gaar u ah dowlad kasta. Waxa ay xuseen in nidaamkii kalitaliska ahaa ee millaterigu uu kala daadiyey nidaamka garsoorka 1969 kii, oo uu dhistay Maxakamadda Badbaadada Qaranka, taas oo 21 sano oo kalitalisnimo ah si naxariis darro ah u shaqaynaysay. Waxa kale oo ay saraakiishani tilmaameen in maqnaansha arrimaha fulinta ee fadderaalka iyo isticmaalka nidaamka garsoorka isku-dhafani, aanay arrintan xidhiidh la lahayn.[54]

Si kastaba ha ahaatee, kuburo iyo saraakiil badan oo Muqdisho iyo meelo kaleba jooga ayaa doorbiday in wax ka beddel lagu sameeyo dastuurka, lana hirgaliyo nidaamka garsoorka isku dhafan. Waxa ay ku doodeen in nidaamka garsoorka isbarbar-socdaa aanu ahay mid dalka si fudud uga dhaqangali kara, maxaa yeelay: (b) waa ku qaali dal sabool u ah sida Soomaaliya, halkaas oo ay iminka laanta garsoorku tahay mid aan helin dhaqaale ku filan, (t) ma jiro karaan bulsheed oo dabooli kara baahiyaha maxakamado badan oo siman, (j) isku ekaanshaha nidaamyada sharci ee laga isticmaalo guud ahaan dalka ayaa ah mid aad u layaab badan oo haddii wax laga beddelo wax badan ayuu wax ka beddelayaa garsoorka (x) bulshada Soomaaliyeed ayaa ah mid aan inta badan xuduudo kala lahayn, taas oo aad u adkeynaysa kala soocidda awoodaha sharciga.[55]

Intaas waxa dheer, khubaradani waxa ay ku doodeen in nidaamka garsoorka laga dhigo mid aan la siyaasadayn, lagana waantoobo doodaha madhalayska ah ee ka taagan su'aalaha badan ee khuseeya federaalka, sida awoodaha iyo wadaagista kheyraadka, maxaa yeelay arimahaasi waa kuwo asal ahaan siyaasadaysan.

53 Eeg Maqaalka PCoS 108.
54 Wareysiyo lala yeeshay Madaxda cadaaladda ee Puntland, Jubaland, Koonfur-Galbeed iyo Galmudug. (2020).
55 Wareysi lala yeeshay wasiirkii hore ee cadaalada Faarax Cabdulkaadir iyo Wareysiga lala yeeshay Aadan S. Jaamac oo ka tirsan Hay'adda IDLO (2020).

*“Xataa guddoomiyihii hore ee baarlamaanka Jawaari, oo loo tixgaliyo nin ay fadderaalnimadu ku dheertahay ayaa sheegay, in nidaamka garsoorka ee isku- dhafan si fudud loo dhaqangalin karo*

Xataa guddoomiyihii hore ee baarlamaanka Jawaari, oo loo tixgaliyo nin ay fadderaalnimadu[56] ku dheertahay ayaa sheegay, in nidaamka garsoorka ee isku- dhafan si fudud loo dhaqangalin karo, “maxaa yeelay xeer-ciqaabeedka dalka oo dhan laga isticmaalaa waa isku mid, mana arko in ay jirto sabab keenaysa in kiisaska la kala geeyo laba maxakamadood oo kala duwan.” [57] Balse waxa uu qoraalkiisu ku nuuxnuuxsaday in baahi weyn loo qabo in dadka Soomaaliyeed lagu kala bogsiiyo oo la isugu soo dhaweeyo dib u heshiisiin qaran, si loo gaadho is afgarad ku saabsan nidaam-garsoor oo dalka oo dhan ka hirgala.

## 6.2 Heshiiskii Jowhar

Bishii Jannaayo 2018, shir saddex maalmood socday oo ku saabsanaa garsoorka ayaa lagu qabtay caasimaddii kumeelgaarka ahayd ee maamul-goboleedka Hirshabeelle. Waxa la filayey in ay tahay fursad la isugu soo dhawaynayo farqiga u dhexeeya DFS iyo dawladaha xubnaha ka ah fadderaalka ee ku aaddan qaabka ugu habboon garsoorka Soomaaliya, iyada oo ujeeddada la sheegay ay tahay in ay saameyn ku yeelato howlaha dibu-eegista dastuurka. Dhammaan dawladaha xubnaha ka ah fadderaalka waxa matalayay wasiirrada caddaaladda, sida oo kale dawladda dhexe ee fadderaalka waxa iyadana matalayey wasiirka caddaaladda, in kasta oo aanu matalaynin Maamulka Gobolka Banaadir.

Shirkan waxa laga soo saaray afar bayaan oo muhiim ah: marka kowaad, waxa ay soo jeediyeen in guddida dibu-eegista dastuurku, in ay heshiiskooda siyaasadeed ku daraan hannaanka dibu- eegista dastuurka ee la xiriira nidaamka garsoorka dalka; tan labaad, waxa ay caddeeyeen ilaa inta dastuurka dibu-eegis lagu sameynayo,waxna laga beddelayo ee la dhameystirayo in gobol kastaa (iyo degmo kastaa) ay sii wadaan in ay ku fuliyaan howlaha garsoorka nidaamka hadda jira; tan seddexaad, Maamulka Gobolka Banaadir waa in ay ilaaliyaan maxakamaddoodii jirtay ilaa heerka ay tahay lagu caddaynayo hannaanka dibu-eegista dastuurka; tan afraad, waxa ay ku dhawaaqeen in ficil ahaan hay’ad garsoor oo federaal ah la mariyo baarlamaanka, kaas oo nidaaminaya nidaamka garsoorka ee dalka.[58]

Natiijada ugu muhiimsan ee ka soo baxday Heshiiskii Jowhar, waxa ay ahayd in Nidaamka Garsoorka Isku-dhan dalka oo dhan laga hirgaliyo, iyada oo dawladaha xubnaha ka ah fadderaalka la siinayo maxakamadaha heerka saddexaad, oo ay awood u yelanayaan in ay qaadaan dacwadaha maxalliga ah, kuwa heer degmo iyo heer gobol. Maxakamadaha racfaanka iyo maxakamadda sare ay yeelato dawladda dhexe ee fadderaalku (maxakamadaha heerka koowaad.) Sharaf ahaan, maxakamadda sare ee heer federaal waxa la siiyay awood gaar ah oo ay ku sameyso xukunka kama dambeysta ah, oo aan racfaan laga qaadan karin dhammaan kiisaska ay xukunto. Markii sidaas la samaynayay, heshiisku waxa uu laba isbeddel oo door weyn ku yeeshay xaaladda hadda jirta: marka hore, dhammaan maxakamadaha gobolka waxa loo ogolaaday in ay dhageystaan dacwadaha federaalka oo qayb ka ah nidaamka garsoorka isku dhafan; iyo tan labaad, oo ah in ay maxakamadaha sare ee gobolku lumiyeen go’aankooda kama danbaysta ah.

---

56 Eeg Warbixinta Machadka Daraasaadka Heritage ee “Fedaraaleyn aan shaqayneyn. (2020).
57 Wareysi lala yeeshay Gudoomiyihii hore ee barlamaanka DFS, Jawaari. Ibid
58 Eeg war-murtiyeedka “Heshiiska Mideysan ee Hannaanka Caddaaladda”. (2018).

Arrintani waxa ay oranaysaa, shay kale oo ay isdiiddooyin kakani ka muuqdaan ayaa lagu soo bandhigay heshiiska: waa abuuritaanka laan ka mid ah maxakamadaha sare ee fadderaalka oo u dhaqmi doonta sidii maxakamadda dastuuriga ah ee dawladda (iyada oo uu mar kale heshiisku caddeynayo in dalku yeelan doono hal maxakamad oo dastuuri ah, taas oo rasmi ku ah magaalada Muqdisho). Jahwareerka jira, go'aannada laanta maxakamadaha dastuurka ee dowladdu waa kuwo aan rafcaan laga qaadan karin marka laga reebo dacwadaha la xiriira xuquuqda insaanka.

Iyada oo lagu guda jiro jahwareer siyaasadeed oo xooggan, kaas oo u dhexeeya DFS iyo dawladaha xubnaha ka ah, ayaa uu haddana Heshiiskii Jawhar ahaa heshiis dhif iyo naadir ah oo farsomo ahaan si taxaddar leh loogu gorgortamay. "Waxa lagu gunaanaday wadatashi saddex sano iyo dhowr bilood ah, waxa aanay ii muujisay yool muhiim ah oo ku saabsan dibuhabaynta garsoorka iyo hannaanka sixitaanka dal ku jira xaalad kala guur ah," ayaa uu yiri mid ka mid ah wasiirradu.[59] In kasta oo ay muuqatay in horumar laga gaadhay habka garsoorka, haddana Heshiiskii Jawhar waxa ugu danbayntii maroorsaday hoggaanka DFS, kaas oo dareemay in wasiirkoodu si fudud u oggol yahay cadaadiska ba'an ee kaga imanaya dhiggiisa dawladaha xubnaha ka ah fadderaalka.[60] Guddoomiyaha maxakamada sare ee federaalka ayaa sida oo kale ka soo horjeestay natiijada, waxa aanu ku sababeeyay in aanay waafaqsanayn dastuurka.[61] Hoggaamiyeyaasha dawladaha xubnaha ka ah fadderaalka ayaan iyaguna waligood ba si buuxda u aqbalin natiijada, iyaga oo ku sababaynaya in dastuurka lagu tuntay. Ugu dambeyn, Heshiiskii Jawhar waxa uu noqday mid ku dhex jaahwareeray nidaamka siyaasadeed ee Soomaaliya ka jira.

> *Ugu dambeyn, Heshiiskii Jawhar waxa uu noqday mid ku dhex jaahwareeray nidaamka siyaasadeed ee Soomaaliya ka jira*

Sidaas oo ay tahay, haddana maxakamadaha dalku waxa ay leeyihiin iskaashi, gaar ahaan dambiyada culculus sida dilka iyo kufsiga. Xeer-ilaaliyaha guud ee Puntland ayaa xusay dacwad ah in eedaysane kufsi loo haystaa uu u cararay magaalada Muqdisho. "Waxa aan ogeysiinayaa xafiiska xeer-ilaaliyaha guud ee federaalka, in eedaysanaha lagu qabtay degmada Yakhshiid, dib loogu soo celiyo Puntland, halkaas oo uu caddaaladda ku wajahayo."[62] Galmudug ayaa sida oo kale dhawaan u masaafurisay magaalada Muqdisho nin aad looga shakisanyahay oo lagu eedeeyay in uu hoggaaminayay koox arxanlaaweyaal ah oo kufsi wadareed iyo dil wada gaysatay.[63]

## 7. Madax-bannaanida nidaamka Caddaaladda


Qodobka 106-aad ee dastuurku, waxa uu sicad oo xooggan u qeexayaa madax-bannaanida nidaamka caddaaladda iyo in uu ka madax-bannaan yahay laamaha dawladda ee fulinta," ma jirto dacwad madani ah ama dacwad ciqaabeed lagu soo oogi karo garsoore inta uu faraha kula jiro howlaha garsoorka,"waxa sidaas sheegaya qodob dastuuri ah, waxaanu intaas ku darayaa in aan qofka garsooraha ah iyo gurigiisa toonna la fatashi karin, ayada oo aan fasax laga haysan golaha adeegga garsoorka."68 xilligan 200 oo garsoore iyo 70 xeer-ilaaliye oo kaliya ayaa mudan in ay helaan ilaalin dastuuri ah.[64]

59 Wareysi lala yeeshay wasiirkii hore ee Cadaalada Jubaland, Aadan Aw-Xersi .(2020). 60 Wareysi lala yeeshay madaxdii hore ee wasaarada Cadaalada. (Nofeembar 2020).
61 Wareysi lala yeeshay gudoomiyihii hore ee Maxkamadda Sare. Ibid
62 Wareysi lala yeeshay Xeer-ilaaliyaha guud ee Puntland. Ibid
63 BBC Somali "Kufsigii Xamdi: Eedeysane Baxsad Ahaa oo Galmudug Lagu Qabtay". (2020). Waxaa ka heli kartaa halkaan: https://www.bbc.com/somali/live/war-54158712
64 Eeg warbixinta Baanka Aduunka ee dib-u-eegista kharashaadka dowladda ee Amniga iyo Cadaalada. Waxaa ka heli kartaa halkaan: https://openknowledge.worldbank.org/handle/10986/26030?show=full. Bogga 48

*Guud ahaan nidaamka Caddaaladda oo ay ku jiraan, xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud iyo dhammaan maxakamadaha ka shaqeeya Mogadisho (maxakamadda sare , maxakamadda racfaanka iyo maxakamadda gobolka Banaadir) ayaa loo qoondeeyay $13.4 milyan, taas oo miisaaniyadda guud ee dalka oo ah $476 milyan ka noqonaysa 6.4%*

Dhammaan madaxdii lagu waraystay daraasaddan waxa ay sheegeen in madaxda garsoorku laba sababood ba ugu dhib qabaan siyaasiyiinta: Tan koowaad in hogaamiyeyaasha siyaasaddu awood u leeyihiin magacaabista iyo ruqsaynta madaxda garsoorka heer federaal iyo heer dawlad- goboleedba; tan labaad, laanta garsoorka saboolnimo kaliya may dishoonnin ee xataa hoggaamiyeyaasha ayaa u isticmaala waxa ay ugu yeeraan "la haystayaal" si ay madaxda caddaaladda gacanta ugu hayaan,[65] dibu-eegista miisaaniyadda dawladda federaalka ee 2020, loo qoondeeyey laanta caddaaladda ayaa tusinaya mudnaanta ay garsoorka siisay dawladdu.

Guud ahaan nidaamka Caddaaladda oo ay ku jiraan, xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud iyo dhammaan maxakamadaha ka shaqeeya Mogadisho (maxakamadda sare , maxakamadda racfaanka iyo maxakamadda gobolka Banaadir) ayaa loo qoondeeyay $13.4 milyan, taas oo miisaaniyadda guud ee dalka oo ah $476 milyan ka noqonaysa 6.4%.[66]




Khubaro ayaa tiri, waxa kaliya ee lagu gaari karo madax-bannaanidda garsoorka waa in laanta fulintu xaddiddo awooddeeda, ayada oo abuuraysa, sida oo kalena dhaqangalinaysa hannaan dhiirrigalinaya madax-bannaani dhab ah. Aadan S. Jaamac, oo ah qareen labaataneeyo sano Soomaaliya ka caawinayey si kor loogu qaado nidaamka caddaaladda, ayaa sheegey in xulista garsoorka, magacaabista garsooreyaasha, iyo hubinta mushaharkoodu ay yihiin meelaha ugu mudan, kuwaas oo laga kobcin karo madax-bannaanida , ama cagsigeeda yarayn karta saamaynta laanta fulintu ay ku hayaan garsoorka.[67]

65 Wareysi lala yeeshay gudoomiyihii hore ee maxkamadda sare, xeer-ilaaliyihii hore ee Soomaaliya iyo maxkamadda saree e Jubbalad. Ibid
66 Wasaaradda Maaliyadda "Xeerka miisaaniyadda dheeraadka ah ee 2020. Waxaa ka heli kartaa halkaan: https://mof.gov.so/publication/supplemental-appropriation-act-2020-budget
67 Wareysi lala yeeshay Aadan Jaamac oo ka tirsan IDLO. Ibid.

## 7.1 Mushaharka aan ku fillayn

> Mushaharka madaxda garsoorka federaalka oo ay ku jiraan garsooreyaasha sarsare iyo xeer-ilaaliyeyaasha, ayaa ah mid aad u hooseeya

Mushaharka madaxda garsoorka federaalka oo ay ku jiraan garsooreyaasha sarsare iyo xeer-ilaaliyeyaasha, ayaa ah mid aad u hooseeya – waana waxa niyad jabiyay garsooreyaal madax ah oo daraasaddaan lagu waraystay. Guddoomiyaha maxakamadda degmada ayaa mushahar ahaan loo siiyaa bishii $900, halka guddoomiyaha maxakamadda sare laga siiyo $2000, sababtuna waa nidaamka gaboobay ee ay dawladda federaaalku u isticmaashay mushahar bixinta.[68] Xeer-ilaaliyihii guud ee hore ayaa sheegay in uu qaadan jirey $1,840 mushahar ah iyo gunno dhowr sannadoodle ah.[69] Taasina waa mid aad ugu ciriiri ah nolosha Muqdisho, waayo qiimaha nolosha ayaa cirka isku shareeray sannadahan.[70] Marka aad xil sare ka haysid DFS ,meelaha ugu qaalisani waa ammaanka. Inta badan dadka xilalka sare hayaa waxa ay leeyihiin ugu yaraan koox ilaalo ah oo hubaysan oo ay mushaharkooda bixiyaan.

Haddii madaxdii caddaaladda ee heer federaal ka cabanayaan dhaqaale xumo , dhiggooda dawlad goboleedyada xaalku waa ka sii liitaa oo xitaa bilo dhan mushahar ma qaataan. Garsooreyaasha iyo xeer-ilaalinta Jubbaland, Koofur Galbeed iyo Galmudug, waxa ay noo sheegeen in aan wax mushahar ah la siinin in muddo ah.[71]

Puntland oo xaaladda mushaharku waxoogaa ku roonyahay, caqabaddu waxa ay ka taagan tahay miisaaniyadda laanta caddaaladda oo hooseeya. Mid ka mid ah madaxda caddaaladda waxa uu noo sheegey haddii wax ka jabaan sida miis ama kursi in uu isagu soo gado oo dayac tiro, waayo ma jirto miisaaniyad loogu talogalay dayactirka.[72] Galmudug xaaladdeedu waa ay kasii liidataa. Maxakamadda sare iyo xeer-ilaaliyaha guud midna xafiis kuma laha caasimadda cusub ee maamulka Galmudug, Dhuusomarreeb. Waxa aanay howlahooda ku fushadaan xarunta bilayska- xilliyo gaar ah oo xaddidan.

> Wasiirka caddaaladda ee Maamulka Koofur Galbeed, Maxamed Xuseen Xasan, ayaa yiri, "aad baa ay u adagtahay in la aammino qaaddi la daalaadhacaya dhaqaale xumo

Madax sarsare, oo uu ku jiro wasiirka caddaaladda ee dawladda fadderaalku, ayaa rumaysan in ay dhaqaale xumada joogtada noqotay weecin karto kalsoonida Garsooreyaasha iyo xeer-ilaalinta. Wasiirka caddaaladda ee Maamulka Koofur Galbeed, Maxamed Xuseen Xasan, ayaa yiri, "aad baa ay u adagtahay in la aammino qaaddi la daalaadhacaya dhaqaale xumo. Macnuhu waa in aanu qofkaasi si madax-bannaan u xukumi karin dhacdo.'[73] Waxa uu sheegey in Garsooreyaal badan oo aan mushahar la siinini ay samaynayaan go'aanno nolol beddelasho ah. Waxa kale oo u sheegey in ay isku dayayaan sidii ay uga bixi lahaayeen dhibaatadan, iyaga oo xiriir la yeelanaya dawladda federaalka ama hay'ado caalami ah.

Iyada oo ay jirto caqabaddan dhaqaale, waxa ay laanta garsoorku dhaqaale u soo xaraysaa dawladda federaalka iyo dawlad-goboleedyadaba. Waxa uu xeer-ilaaliyihii guud ee hore sheegey in maxakamadaha caasimadda ku yaalla oo kaliya ay qiyaastii ka soo xaroodaan dhaqaale ku filan kharashaadkooda, waa haddii dhaqaalaha ay soo xareeyaan loo maareeyo si wanaagsan. Waxa uu sheegay in kiisaska madaniga ah sida dhulalka la isku haysto, oo ah kuwa ugu khilaafka badan, in khidmadda ay maxakamaddu ka qaaddo lagu qiimeeyo handida lagu muransan yahay qiimaheeda.[74] Caadadaasi waxa ay kor u qaadi kartaa caddadka dhaqaale ee u soo xerooda DFS.

68 Eeg warbixinta Baanka Aduunka ee dib-u-eegista kharashaadka dowladda ee Amniga iyo Cadaalada. Waxaa ka heli kartaa
halkaan: https://openknowledge.worldbank.org/handle/10986/26030?show=full. Bogga 49
69 Wareysi lala yeeshay xeer-ilaaliyihii hore ee Soomaaliya. ibid
70 Burke, J., "Seddexda Sheeko ee Muqdisho: Colaad, dhaqaale soo kobcaya iyo macluul tagan hada". (2017). Waxaa ka heli kartaa halkaan: https://www.theguardian.com/cities/2017/may/15/mogadishu-violence-booming-economy-famine
71 Wareysi lala yeeshay madaxda cadaaladda ee Jubbaland, Koonfur-galbeed iyo Galmudug. Ibid.
72 Wareysi lala yeeshay madaxda cadaaladda ee Puntland. Ibid.
73 Wareysi lala yeeshay Maxamed xuseen xasan, wasiirka cadaaladda ee Koonfur-galbeed. (2020). Baydhabo.
74 Wareysi lala yeeshay gudoomiyaha maxkamadda sare ee Soomaaliya. (2020)

## 7.2. Ilaalo la'aanta

Dhowr goor ayaa ay kooxo hubaysani nagu soo weerareen xarunta, iyaga oo la baxay eedaysaneyaal dhagaysiga dacwaddoodu socotay.

Madaxda garsoorka dalka waxa ku xeeran khataro aan tiro lahayn, oo ay ka mid tahay in ay naftooda waayaan. Xeer-ilaaliyaha guud ee Puntland ayaa yiri, "dhowr goor ayaa ay kooxo hubaysani nagu soo weerareen xarunta, iyaga oo la baxay eedaysaneyaal dhagaysiga dacwaddoodu socotay."[75] Waxa uu intaas ku daray, in aan marar badan cidna loo ciqaabin khaladaadkaas, sababta oo ah dambiileyaashaasi waxa ay ahaayeen qaar awood badan. Halkaasi waa Puntland, oo ah gobolka dhanka nabadgalyada iyo midnimada ugu horreeya Soomaaliya.

Madax badan oo daraasaddan lagu waraystay ayaa hoosta ka xarriiqay in ilaalo la'aanta madaxda garsoorka looga golleeyahay in awoodda siyaasadeed laga fogeeyo laanta garsoorka, kaas oo ah qorshe ay wataan hoggaamiyeyaasha siyaasaddu. Garsoore hore, oo noo warramay ayaa noo sheegey, in uu codsi ah in miisaaniyad loo sameeyo qayb bilays ah oo ilaaliya madaxda maxakamadaha uu u gudbiyey Raysalwasaaraha, waxase loogu soo jawaabay in uu dalabkiisu ka gudbay diillinta cas.[76] Si kastaba ha ahaatee wasiirkii hore ee caddaaladda oo shaqadiisu ahayd in uu gudbiyo codsiga kordhinta miisaaniyadda laanta garsoorka, ayaa yiri hannaanka miisaniyadda DFS waxa loo sameeyey mid aan suurtogal ka dhigayn qoondayn macquul ah. Waxa uu intaas ku daray in aan muhiimad weyn la siinnin shaqada laanta garsoorka, oo ay jirto khalad fahan ku saabsan sida ay u shaqayso.[77]

## 7.3 Maqnaanshaha awoodda fulinta

Guddoomiya cusub ee maxakamadda sare ee Galmudug, ayaa yiri, ''waxa aannu la tacaamulaynaa bulsho aan saraynta sharciga aqoon ku dhawaad 30 sano


Mid ka mid ah caqabadaha ugu waawayn ee hortaagan nidaamka caddaaladda ayaa ah maqnaanta go'aan fulin leh oo lagu xukumo danbiyada madaniga ah iyo kuwa ciqaabta. Madax badan oo federaal ah iyo kuwo dawlad-goboleed ah ayaa sheegey in dhibtu tahay in aanay bulshadu aqoonnin muhiimadda laanta garsoorka, iyada oo la iska indhatiro amarka maxakamadaha, taas oo dhaawici karta kalsoonida iyo sharafta garsoorka. [78] Waxa jira dhowr shay oo ka qayb qaata arrintan: kan koowaad, waa xaakinnada oo aan lahayn siyaasad uga dajisan sidii ay u fulin lahaayeen xukunnada xad-dhaafka ah ee maalin kasta dhaca; tan labaad, dad badan oo iskaga baxa dacwadda maxakamadda ayaa hela xukun ay ku qancaan-xeer-dhaqameedka ama shareecadda Islaamka ha ka helaane; tan saddexaad, inta badan aad bay u yar tahay in la isku ciqaabo fulin la'aanta amarrada maxakamadaha ka soo baxa, maxaa yeelay shuruucda sheegeysa in la ciqaabo qofka jabiya amar maxkamadeed aad ayey u yar yihiin; tan afraad, bulsho ahaan waa wax iska caadi ah in la diido amarka maxakamadda[79] Guddoomiya cusub ee maxakamadda sare ee Galmudug, ayaa yiri, ''waxa aannu la tacaamulaynaa bulsho aan saraynta sharciga aqoon ku dhawaad 30 sano.[80]

75 Wareysi lala yeeshay Xeer-ilaaliyaha guud ee Puntland. Ibid.
76 Wareysi lala yeeshay garsoore sare ee hore.
77 Wareysi lala yeeshay wasiirkii hore ee cadaaladda Soomaaliya. Ibid.
78 Wareysi lala yeeshay wasiirka cadaaladda ee Koonfur-galbeed. Ibid.
79 Wareysi lala yeeshay madaxda cadaaladda ee Puntland, Jubbaland, Koonfur-galbeed, Galmudug iyo DFS.
80 Wareysi lala yeeshay gudoomiyaha maxkamadda sare ee Galmudug, Cabdullaahi Maxamuud Gacal. (2020). Gaalkacyo.

# 8. Musuqmaasuqa iyo maamul xumada

*"Soomaaliya waxaa lagu suntay in ay dunida kaga jirto kaalinta ugu hoosaysa hufnaanta oo ay tahay dalka ugu musuqmaasuqa iyo isdabamarinta badan caalamka ilaa 2006. Arrintani waxa ay ka caraysiisay Soomaali badan*

Soomaaliya waxaa lagu suntay in ay dunida kaga jirto kaalinta ugu hoosaysa hufnaanta oo ay tahay dalka ugu musuqmaasuqa iyo isdabamarinta badan caalamka ilaa 2006. Arrintani waxa ay ka caraysiisay Soomaali badan. "[81] Xaaladda waxa sii foolxumeeyey danbiga oo noqday dhaqan caadeystay nidaamka caddaaladda. Wasiirka cusub ee caddaaladda dawladda federaalka, ayaa qiray in uu musuqmaasuq ragaadiyay nidaamka caddaaladda ee dalka, kaas oo ay keentay ciqaab la'aanta danbiilayaashu.[82] Dibuhabayntii ugu danbeysay oo uu sameeyay xeer-ilaaliyaha cusub ee dhallinyarada ahi oo ah xeer-ilaaliyaha guud iyo guddoomiyaha maxakamadda sare, ayaa ay ku dhimeen musuqmaasuqa ka dhex jira maxakamadaha federaalka iyo gobolka Banaadir, waxa aanay hagaajiyeen helitaanka caddaaladda. Si kastaba ha ahaatee, dhammaan madaxdii iyo khubaradii aannu ku soo waraysannay daraasaddani iskumay khilaafsanayn in ay laanta caddaaladdu la il daran tahay musuqmaasuq dhexdeeda ah iyo maamul xumo. Waxa ay tiriyeen dhowr qodob oo sabab u ah arrimahaas: kan koowaad, sidii aynnu hore u soo sheegney, dhaqaale yaraanta madaxda garsoorku waxa ay dhiirrigalinaysaa musuqmaasuqa ama xatooyada tooska ah. Tan labaad, madax badan baa sheegtay in eedaysanayaashu caadaysteen in ay raadiyaan hab ay ku heli karaan waxa ay jecel yihiin, madax badan oo caddaaladda ka shaqaysa ayaa eedaysanaha ku khasba in uu racfaan qaato, si ay ugu khasbaan in uu bixiyo laaluush dheeraad ah oo u siiyo madax kale oo caddaaladeed. Tan saddexaad, waa maqnaanshaha nidaamkii kormeera ah , sida Golaha Nidaamka Garsoorka ( ama hay'ado u dhigma oo ka jira dawlad-goboleedyada) taas ayaana fududaynaysa in madaxdu si toos ah iyo si dadban ba wax u xadaan.[83]




81 Transparency International "Tusmada aragtida musuqmaasuqa ee Soomaaliya". (2019). Waxaa ka heli kartaa halkaan: https://www.transparency.org/en/countries/somalia
82 Wareysi lala yeeshay wasiirka cadaaladda dowladda federaalka, Cabdulqaadir Maxamed Nuur. (2020). Muqdisho.
83 Wareysi lala yeeshay wasiirkii hore ee cadaaladda, iyo madaxda hada ee dowlad-gobaleedyada. Ibid.

> Cilmibaaristaasi, waxa ay sheegtay madaxii hore ee maxakamadda sare ee caddaaladda in ay 50-70% garsooreyaasha maxakadaha federaalka fadhiyaa ay ku yimaaddeen musuqmaasuq ay sameyn jireen garsooreyaasha ugu sarreeya dalku

Meesha ugu darani, waa maxakamadaha diiwaangaliya dacwadaha madaniga ah, sida muranka dhulalka ee magaalada Muqdisho. 2017dii daraasad qiimo leh oo ay Machadka Heritage iyo Machadka Rifti Vallay ka sameeyeen dhibaatada dhulalka Muqdisho, ayaa tiri, "waxa aannu ogaannay in musuqmaasuqu ku faafay maxakamaddaha oo uu yeeshay halqabsiga ah, "ku qabso ku qadi mayside".[84] Cilmibaaristaasi, waxa ay sheegtay madaxii hore ee maxakamadda sare ee caddaaladda in ay 50-70% garsooreyaasha maxakadaha federaalka fadhiyaa ay ku yimaaddeen musuqmaasuq ay sameyn jireen garsooreyaasha ugu sarreeya dalku.[85]

## Dibuhabaynta Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud

Bishii Nofeembar 2019, ayaa uu madaxweyne Farmaajo u magacaabay xeer-ilaaliyaha guud ee federaalka Suleymaan Maxamed Maxamuud, kadib markii uu soo jeedintaas ka helay guddoomiyaha maxkamadda sare. Tan iyo markii uu Maxamuud xilka la wareegay, waxa uu sameeyay dibuhabayn fara badan oo loogu talagalay in lagu ballaariyo helitaanka caddaaladda iyo la dagaallanka musuqmaasuqa. Wareysi uu bixiyay ayaa uu ku sheegay in muddada uu joogo xafiiska shaqada, uu xaqiijin doono qorshe sheegaya in ay muwaaddiniintu awood u yeeshaan in ay kiisaska cusub bilaash ku furan karaan. Qorsheyaal cusub oo istiraatiijiyadeed, ayaa uu xafiiskiisu hadda la tacaalayaa, kuwaas oo ah dambiyadii hore la iskaga indhatiray, sida tahriibinta dadka, , taas oo uu iminka baaritaan ku hayo xubno ka tirsan golaha baarlamaanka, lacag dhaqidda iyo kalluumeysiga sharci darrada ah ee xeebaha Soomaaliya. Waxa muhiim ah in uu xafiiskiisu magacaabay danbibaadhe khaas u ah rabshadaha ka dhanka ah jinsiga (GBV) xilli uu dalka aad ugu soo "batay kufsigu". Sida oo kale waxa uu magacaabay xeer-ilaaliye kale oo gaar u ah dambiyada ka dhanka ah suxufiyiinta. Soomaaliya waxa lagu tiriyaa in ay ka mid tahay dalalka ay halista ugu badan kula kulmaan suxufiyiintu.[86]

Iyada oo ay ka soo wareegatay muddo sannad ahi markii xafiiska xeer-ilaaliyaha guud dibuhabaynta lagu sameeyey, waxaa laba jibbaarmay tirada danbiyada, iyada oo sannadkii 2019 ay ahaayeen 997 danbi, 2020 na ay gaadheen in ka badan 2300 oo danbi. Ka ganacsiga dadka ayaa ugu sarreeya liiska danbiyada oo ah 200 oo kiis, waxaana ku xiga kufsiga (oo ah ilaa 100 kiis). Dhaawacyada ka dhashay shilalka ay sababaan Mooto-bajaajta ayaa aad ugu sarreeya Muqdisho, musuqmaasuqa ayaa isna kor u kacay 40, oo ay qayb ka yihiin saraakiil sarsare oo ka tirsan DFS.[87]

Si kastaba ha noqotee, caqabado tiro badan ayaa hor yaalla dadaallada loogu jiro dibuhabeynta Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud. Guddoomiyuhu waxa uu ku jiraa kuwa shaqaale yaraantu haysato. Waqtigan la joogo, xafiiska guddoomiyahu waxa uu heystaa shaqaalihii ugu baahnaa dacwad-oogeyaasha 18%, kuwaas oo aan baahida jirta dabooli karin. Intaas waxa dheer, xafiiska waxa ka maqan awoodo muhiim ah, sida qibrad cilmibaariseed, sheybaar heersare ah iyo khubaro takhasus u leh dhaqaalaha iyo dhinacyada kale. Xukun ahaan, xafiiska xeer-ilaaliyaha guud waxa uu ku kooban yahay magaalada Muqdisho oo kaliya.

84 Eeg warbixinta Machadka Rift Valley iyo Machadka Heritage, "Arimaha dhulka ee magaalada Muqdisho". (2017). Waxaa ka heli kartaa halkaan: https://riftvalley.net/publication/land-matters-mogadishu
85 Ibid,
86 Tusaale ahaan eeg, darajada wariyaasha aan xuduuda lahayn. Waxaa ka heli kartaa halkaan: https://rsf.org/en/somalia
87 Wareysi lala yeeshay Xeer-ilaaliyaha guud ee Soomaaliya, ibid

## 8.1 Maxakamadaha Al-Shabaab

> *Xaqiiqo Sannado badan jirta ayay ahayd , in dad badan oo Soomaaliyeed, oo ku nool Soomaaliya ay caddaalad u raadsanayeen maxakamadaha shareecada ee ay maamulaan Kooxda Al-Shabaab*

Xaqiiqo Sannado badan jirta ayay ahayd , in dad badan oo Soomaaliyeed, oo ku nool Soomaaliya ay caddaalad u raadsanayeen maxakamadaha shareecada ee ay maamulaan Kooxda Al-Shabaab. Arrintan ayaa noqotay mid aan qarsoonayn, taas oo uu guddoomiyaha maxakamadda sare ee Soomaaliya, Baashe Yuusuf Axmed , ka diiday dadka lagaga guulaysto xukunka in ay caddaalad u raadsadaan maxakamadaha Al-Shabaab. Dadka cadddaaladda u doonta xukunka Al-Shabaab ayaa ah kuwa ku guuldarraysta Maxakamadaha Muqdisho, waana dad haysta caddaymo been abuur ah. Ma aqbalayno in arrintaasi sii socoto," ayaa uu guddoomiyuhu yiri".[88] Wasiirka caddaaladda ee dowlada federaalka ayaa sheegay in "Al-Shabaab sii awoodaysanayso, maxaa yeelay dadka ku nool meelaha ay dowladu maamusho waxa ay caddaalad ka raadsadaan maxakamadaha Al-Shabaab, iyaga oo rumeysan halkudhigga ah in maxakamadaha Al-Shabaab ay ka caddaalad wanaagsan yihiin maxakamadaha dawladda."[89]

Inkasta oo dacwadahu ku kala duwan yihiin dhanka xajmiga iyo culayska, inta badan xukunnadda Al-Shabab lala aadaa waa kuwa madaniga ah, waxa sidaa yiri, sarkaal ka tirsan madaxda Jubbaland.[90] Danbiyada badankoodu waxa ay la xiriiraan muran dhul iyo muran ganacsi, kuwaas oo ay aad u adagtahay gartoodu, xogta dawladeed ee laga hayaana ay yartahay. Waxa xusid mudan, marka laga reebo dadka ku hoos nool xukunka Al-Shabaab, dadka kale badankoodu marka ugu horraysa ma tagaan maxakamadaha Al-Shabaab, laakin waxa ay u qaataan racfaan. Madax aannu ku waraysannay daraasaddan ayaa noo sheegay, in badanaa dadka dacwadaha la taga maxkamadaha Al-Shabab ay yihiin dadka ku nool deegaannada ay xukunto DFS ama Maamul Goboleedyada xukunkoodu gaadhaan. Dadku ma aha qaar aamminsan habka maxakamadaha Al-Shabaab, laakiin waxa ay u arkaan in maxakamadaha kale ay musuqmaasuq iyo gaabis yihiin.[91] Maxakamadaha Al-Shabaab waa ay ka degdeg badan yihiin, waana ay ka fulin ogyihiin. Xukunkii ay ridaan khasab iyo cagajuglayn bay ku fuliyaan xataa meelaha aanay maamulin. Qofka xukunka laga helo waxa ay ku qasbaan in uu u hoggaansamo natiijada xukunka Alle, ama waxa kaliya ee ay dadkaasi ku qasban yihiin waa xukunka Al-Shabaab. [92] Hase ahaatee, tani waa isbeddel ku dhacay nidaamka caddaaladda Soomaaliya kaas oo aan cidina hore u qiimaynin. Inkast oo aannaan haynnin xog ku saabsan dadka xukunka u taga Maxakamadaha DFS iyo kuwa Dawlad-Goboleedyada, waxa aynnu ka qiyaas qaadan karnaa yaraanta xukunnada ka socda gobollada waaweyn sida Banaadir iyo Puntland, taas ayaana tusaale u ah in ay dad badani caddaalad u doontaan xukunka Al-shabab.

---

88 Garowe Online "Dadka waxaa looga digay inay cadaalad ka raadsadaan maxkamadaha AL-Shabaab". (2018). Waxaa ka heli kartaa halkaan: https://www.garoweonline.com/en/news/somalia/somalia-people-warned-against-seeking-justice-in-al- shabaab-courts
89 Wareysi lala yeeshay wasiirka cadaaladda ee Soomaaliya, Cabdulqaadir Maxamed Nuur, ibid
90 Wareysi lala yeeshay Xeer-ilaaliyaha Guud ee Jubbaland. Ibid.
91 Wareysi lala yeeshay Gudoomiyaha maxkamadda sare ee Soomaaliya.
92 Wareysi lala yeeshay masuul ka tirsan cadaaladda Koonfur-galbeed. (2020). Baydhabo.

# 9. Nidaamka Garsoorka Xeer-dhaqameedka

Nidaamka Garsoorka Xeer-dhaqameedka ayaa Soomaalida qarniyo badan u ahaa nidaam ay ku xalliso khilaafyada dhexdeeda ka dhaca. Tan iyo markii la aasaasay dawladnimada casriga ah 1960, Xeer-dhaqameedka waxa loo aqoonsanaa in uu yahay nidaam beddel u ah kan casriga ah oo lagu xalliyo khilaafaadka (ADR) Xeerku asal ahaan waxa uu ku saleysan yahay fiqiga shareecada Islaamka, laakiin waxa lagu xoojiyay xeerarka bulshada ee aan ka hor imaneynin mabaadi'da aasaasiga ah ee Islaamka.[93] "Nidaamka Xeer-dhaqameedka ee xallinta khilaafyadu waxa uu ka kooban yahay hannaano ay dhinacyadu ku xalliyaan khilaafaadka dhexdooda, iyaga oo gacan saddexaad ka helaya dhexdhexaadiyeyaasha ama garqaadeyaasha, inta badan maxakamad la'aan ayay khilaafkooda ka xalliyaan." [94] Nidaamkan waxa lagu dhaqmayey qarniyo badan waxaana dib u soo labakacleeyey oo u door muhiim ah ka ciyaaray khaalfyadii dagaallada sokeeye tan iyo 1991 markii maxakamadihii sharciga ahaa meesha ka baxeen. Xeerku ma aha sharci qoran oo caqiido ah, laakiin waa nidaam aan rasmi ahayn oo si taxaddar leh loo qaabeeyey si loogu xalliyo khilaafaadka u dhexeeya beelaha reeraha kala qoqoban.

> *Soo shaacbixista habka xallinta khilaafaadka ee soo jireenka ah, waxa loo aaneyn karaa qoto-dheerida kalsooni darrada ay ka qabaan shacabku nidaamka caddaaladda ee rasmiga ah*

Soo shaacbixista habka xallinta khilaafaadka ee soo jireenka ah, waxa loo aaneyn karaa qoto-dheerida kalsooni darrada ay ka qabaan shacabku nidaamka caddaaladda ee rasmiga ah. Dib u eegis uu Bangiga Aduunka sameeyay ayaa lagu ogaaday in "Nidaamka maxakamada rasmiga ah loo arko mid qaali ah, oo aan la heli karin isla markaana u nugul wax is daba marinta, iyada oo Soomaalidu ay ugu horeyn ku tiirsan shirar-dhaqameedyada ama gole beeleedka lagu xalliyo khilaafaadka."[95] Nidaam dhaqameedku waxa uu ahaa hannaanka ugu xooggan tobannaankii sano ee la soo dhaafay iyada oo maxakamadaha sharciga ahi ay sii xumaanayeen oo ay ku yaraanayeen qaybaha kala duwan ee dalka. Hannaankan waxa udub dhexaad u ah Nidaamkii Xeerka, oo loo adeegsan jiray si la mid ah maxakamadaha sharciga iyo maxakamadaha Shareecada. Inta badan oday dhaqameedka beeshu waxa uu dacwadaha ku galaa nidaamka Xeerka, waxa aanu kormeer ku sameeyaa dhaqangalkiisa. Dad badan oo Soomaaliyeed ayaa u arka in nidaamka Xeerku yahay mid si fudud loo heli karo, oo si hawl loogu garnaqsan karo, sida oo kale waxa ay u arkaan in uu yahay kan ugu muhiimsan in wax lagu kala xukumo.[96] Taas macnaheedu ma aha in uu had iyo jeer yahay hab lagu guuleysto oo lagu xalliyo khilaafaadka, balse waa nidaam ka dhaqan galay reeraha dhexdooda.

Qiyaas ahaan, inta u dhaxeysa 80-90% dacwadaha sharciga ah ee kajira Soomaaliya, dhamaantood waxa lagu xalliyaa nidaamka caddaaladda ee aan rasmiga ahayn, kaas oo Xeer-dhaqameedku yahay kan ugu caansan. Tusaale ahaan, Somaliland, nidaamka Xeerka iyo maxakamadaha shareecadu,"si isku mid ah ayey u wada shaqeeyaan".[97] Khubarada ayaa sheegaya in ay arrintan sabab u tahay kalsoonida lagu qabo nidaamka sharciga ee rasmiga ah. "In kasta oo dedaallo baaxad leh loogu jiro in la hagaajiyo nidaamka caddaaladda rasmiga ah, wali jidka lagu gaadhayo in si buuxda nidaam caddaaladeed oo rasmi ah loo dhisaa wakhti dheer ayey qaadanaysaa.

93 Zuin, M. "Qaab-dhismeed ku saabsan cadaaladda ku-meel-gaarka ah ee Soomaaliya. (2008). JaamacaddaTufts. Waxaa ka heli kartaa halkaan: https://sites.tufts.edu/praxis/files/2020/05/5.-Zuin.pdf

94 PACT ee USAID. "Hindisaha Xallinta Khilaafaadka kale ee Soomaaliya". (2020). Waxaa ka heli kartaa halkaan: https://www.usaid.gov/sites/default/files/documents/1860/ADRReport.pdf

95 Eeg warbixinta Baanka Aduunka ee dib-u-eegista kharashaadka dowladda ee Amniga iyo Cadaalada. Waxaa ka heli kartaa halkaan: https://openknowledge.worldbank.org/handle/10986/26030?show=full. Bogga 47

96 Zuin, M. "Qaab-dhismeed ku saabsan cadaaladda ku-meel-gaarka ah ee Soomaaliya". Ibid.

97 PACT ee USAID. "Shareecada Soomaaliya". (2020). Waxaa ka heli kartaa halkaan: https://www.usaid.gov/sites/default/files/documents/1860/Shariah-in-Somalia.pdf

> “
> *Wali dadku nidaamka rasmiga ah kuma kalsoona. Waa qaali, waxaana loo arkaa in si weyn loo musuqmaasuqay, sida oo kalena la siyaasadeeyay*

Wali dadku nidaamka rasmiga ah kuma kalsoona. Waa qaali, waxaana loo arkaa in si weyn loo musuqmaasuqay, sida oo kalena la siyaasadeeyay, ”ayaa uu yiri, Adaan Jaamac oo ka tirsan IDLO, kaas oo ururkiisu ka mid yahay dhawr urur oo ka shaqeeya xoojinta Nidaamka Xeer-dhaqameedka Soomaaliya.[98]

Marka ay xaaladdu sidaas tahay, waxa jira su’aalo dhab ah oo ku saabsan qiimaha Nidaamka Xeer-dhaqameedka ee xallinta danbiyada. Daraasad ayaa lagu ogaaday in Nidaamka Xeer-dhaqameedku “ uu yahay nidaam wax weyn ka taray farsamooyinka ka soo kabashada” kaas oo loogu talagalay in lagu keeno guulo laba geesood ah. Intaas waxa dheer, daraasaddan ayaa lagu ogaaday in aanu Nidaamka Xeer-dhaqameedku lahayn awood fulineed oo la taaban karo, maaddaama aanay odayaasha qabaa’ilku gebi ahaanba u qalabaysnayn kormeerka fulinta.[99] Si kastaba ha noqotee, khabiirro kale ayaa ka doodaya sheegashadaas. Morgherita Zuin waxa ay ku doodeysaa in “Nidaamka Xeerku ka dhaqan gal badan yahay kan sharciga ah, sababta oo ah cadaadiska bulshada ayaa qasbaya u hogaansanaanta xukunkiisa.”[100] Adaan Jaamac oo ka tirsan IDLO ayaa yiri, “Nidaamka xeer-dhaqameedku waxa uu ku dhisanyahay wadaxaajood iyo dhexdhexaadin, kuwaas oo ugu horrayn ba kaalin muhiim ah ka ciyaara heerar dhaqannada Soomaaliya, maadaama ay yihiin farsamooyin maamul oo ay qaateen odayaasha iyo wadaaddadu si loo soo celiyo nabaddii beelaha iyo bulshada Soomaaliyeed. Sidaa darteed, farsamadu waa mid si fudud loo fahmi karo laguna dabaqi karo heer bulsho. Dhaqangalintu waa ay fududaanaysaa marka go’aannada la ansaxiyo ama ay isla qaataan madax-dhaqameedku, iyaga oo adeegsanaya nidaamka xeer-dhaqameedka.”[101]

## 9.1 Xarunta Nidaamka Xeer-dhaqameedka ee xallinta Khilaafaadka

Wasaaradda caddaaladda ee Soomaaliya oo kaashanaysa ha’yadda Qaramada Midoobey ee UNDP, ayaa sannadkii 2013 magaalada Muqdisho ka hirgelisay xarunta Nidaamka xeer-dhaqameedka ee xallinta khilaafaadka ee loo soo gaabiyo (ADR), waxa aanay dawladdu barnaamijkaas sii ballaarisay sannadkii 2014, markii ay wasaaradda caddaaladdu hirgalisay golaha kumeelgaarka ah ee xallinta khilaafaadka (TDRU), iyada oo ay caawimaad ka heleyso Ha’yadda caalamiga ah ee horumarinta sharciga (IDLO).

Wasaaradda Caddaaladda ayaa sii wadday dadaalkeeda, waxa aanay diyaarisay warqad ay ku qoran yihiin macluumaadka si talooyin looga bixiyo “Horumarinta nidaamka xeer-dhaqameedka ee xallinta khilaafaadka si uu noqdo nidaam waafaqsan dastuurka iyo xeerarka caalamiga ah ee ilaalinta xuquuqal insaanka” iyo in si qotodheer loola xiriiriyo ha’yadaha sharciga”[102] Wasaaradda caddaaladda ee Soomaaliya waxa ay saddex mashruuc oo tijaabo ah ka daahfurtay saddex degmo oo ku yaalla Muqdisho, kuwaas oo kala ah Xamar-weyne, Xamar-Jajab iyo Wadajir.[103]

---

98 Wareysi lala yeeshay Aadan Jaamac oo ka tirsan Hay’adda IDLO. Ibid.
99 PACT ee USAID. “Shareecada Soomaaliya”. Ibid.
100 Zuin, M. “Qaab-dhismeed ku saabsan cadaaladda ku-meel-gaarka ah ee Soomaaliya”. Ibid.
101 Wareysi lala yeeahay Aadan Jaamac oo ka tirsan hay’adda IDLO. Ibid.
102 Eeg warbixin siyaasadeedka wasaaradda cadaaladda ee ku saabsan cadaalad-dhaqameedka. (2014). 103 PACT ee USAID. “Qaab-dhismeed ku saabsan cadaaladda ku-meel-gaarka ah ee Soomaaliya”. Ibid.

Taabbogelinta barnaamijyada wasaaradda caddaaladda ee dadka wax loogu sheegayo ayaa ah kuwo wax ku ool ah oo casri ah oo looga golleeyahay in si tartiib ah lagu casriyeeyo nidaamka xeer-jajabka ah si meesha looga saaro caqabadaha hor taagan in dumarka iyo dadka la gacan bidxeeyay ay caddaalad helaan. Waxa intaa dheer, in wasaaraddu ay ka dhawaajisay baahida loo qabo in nidaamka Xeer-jajabka la waafajiyo dastuurka iyo xeerarka caalamiga ah ee ilaalinta xuquuqal insaanka, waxa dhammaan dadaalladan la sameeyay iyada oo loo marayo dood wadaag ay garwadeen ka tahay wasaaradda caddaaladdu, si loo yareeyo waxyaabaha ka dhalan kara dhaqamada halista ah iyo falcelinta xun ee ka timaadda dhinaca bulshada.[104]

> *Maanta xarumaha xallinta xeer-dhaqameedka ee Muqdisho ku yaalla waa saddex xarumood oo waa weyn, kuwaas oo kula yaalla 15 ka mid ah 17 ka degmo ee caasimadda Muqdisho*

Maanta xarumaha xallinta xeer-dhaqameedka ee Muqdisho ku yaalla waa saddex xarumood oo waa weyn, kuwaas oo kula yaalla 15 ka mid ah 17 ka degmo ee caasimadda Muqdisho. Degmooyinka Yaakhshiid iyo Cabdulcasiis waxa ay hoostagaan xarunta ku taalla Kaaraan, halka xarunta Xamar-Jajab ku taallaa ay maamussho degmooyinka kala ah Xamar-Weyne, Waaberi, Boondheere iyo Shaangaani, sida oo kale Xarunta ku taalla Hodan waxa hoos yimaadda degmooyinka kala ha Howlwadaag, Wardhiigley, Wadajir iyo Dharkaynley. Waxa dhammaan xarumahaas gacanta ku heysa wasaaradda caddaaladda ee Soomaaliya. Xarun kasta oo ka tirsan xarumaha xallinta xeer-dhaqameedka, waxa ay leedahay 10 xubnood oo ka tirsan guddi qaabilsan arrimaha nabadda, waxa aanay ka kooban tahay labo dumar ah iyo xubno ka tirsan bulshada rayidka. Xarun kasta oo ka tirsan Xarumaha xallinta xeer-dhaqameedka waxa ka shaqeeya saddex qof oo ay shaqaalaysiisay wasaaradda caddaalladu, si ay u taageeraan shaqada xarunta ka socota. Xubnaha ka tirsan Xarumaha xallinta xeer-dhaqameedka waxa ay iska sii dhex doortaan guddoomiye, guddoomiye ku xigeen iyo xogheyn, si ay u qabtaan howsha ugu weyn ee lagu xallinayo khilaafaadka bulshada.[105]

Marka laga yimaaddo magaalada Muqdisho, magaalooyinka kale waxa ay leeyihiin xarumo xeer-dhaqameed oo iyaga u gaar ah. Waxa hadda Baydhabo ka jira shan xarumood, oo ay si toos ah u maamusho wasaaradda caddaaladda ee maamulka koonfur galbeed. Xarumahaasi waxa ay si dhow ula shaqeeyaan guddida degmada Baydhabo oo bixiya taakuleyn xagga saadka ah. Maamulka Jubbaland, magaalada Kismaayo ayaa leh saddex xarumood oo ay gacanta ku heyso wasaaradda caddaaladda ee maamulka Jubbaland. Labada xarumoodba, waxa ay la mid yihiin kuwa Muqdisho ka jira, sida oo kale waxa ay leeyihiin odayaal iyo guddiyo nabadeed ka hawlgala, kuwaas oo taageera shaqada si ay u xoojiyaan sharci ahaanshahooda iyo kalsoonidooda. Marka la eego Baydhabo iyo Kismaayo, matalaadda beelaha ayaa si siman loogu dheellitiraa, si ay uga tarjumto bulshada maxalliga ah una xaqiijiso ka mid noqoshada. Si kastaba ha noqotee, Xarunta xeer-dhaqameedka Muqdisho aad uguma salaysna matalaadda beelaha waxaana ku jira dhammaan qabaa'ilka Soomaaliyeed.[106]

104 Ibid.
105 Ibid.
106 Ibid.
107 Wareysi lala yeeshay wasiirka cadaaladda ee dowladda federaalka, ibid

# 10. Gunaanad

Nidaamka caddaaladda Soomaaliya ee burbursani, waxa uu u baahan in dib u habeyn lagu sameeyo si sharraxaad looga bixiyo waxyaabaha caqabadda ku ah laamaha garsoorka ee dowladda federaalka iyo dawlad-goboleedyada. Sida ku habboon ee uu xusay wasiirka caddaaladda federaalku, waa in ay dawladda fadderaalka iyo dawlad-goboleedyaduba u baahan yihiin in ay mudnaan siiyaan nidaamka caddaaladda, iyaga oo ku bixinaya dhaqaale dheeraad ah, kuna samaynaya dhisitaan xooggan, si loo xoojiyo baadi-goobka loogu jjiro dowlad-wanaagga dalka.[107] Sida oo kale, caqabadaha faraha badan ee horyaalla nidaamka caddaaladda, waxaa kamid ah: kuwo dastuuri ah, qaar sharci ah, arrimo bulsho ama kuwo siyaasadeed ,heykalka iyo arrimaha dhaqaalaha ee gebi ahaanba horseeday in ay adkaato in shacab gaaraya 15 milyan oo qof ay helaan caddaalad. Dadaallada ay wadaan xeer-ilaaliyaha cusub iyo guddoomiyaha maxakamada sare waa wax lagu amaanno, laakiin waxa ay ka gaabiyeen caqabadaha aan macquulka aheyn ee soo food saaray laanta caddaaladda. In la xalliyo dhammaan dhibaatooyinkaas waa in la qaadaa hannaan qeyrul caadi ah oo adag, balse ma aha tallaabo aan suurtogal aheyn, waa mid la sameyn karo, laakinse waxa ay u baahan tahay hoggaan go'aan leh oo raacaya mabaadii'da iyo qiyamka qaranka oo ka tirsan heer federaal iyo heer dowlad-goboleed, si loo sameeyo iskaashi iyo wadahadal.

> *Caqabadaha faraha badan ee horyaalla nidaamka caddaaladda, waxaa kamid ah: kuwo dastuuri ah, qaar sharci ah, arrimo bulsho ama kuwo siyaasadeed*

# 11. Talo bixin

Marka la helo rabitaan siyaasadeed, masuuliyiinta federaalka iyo kuwa dowlad-goboleedyadu waxa ay awood u leeyihiin- in ay dib-u-habeyn ku sameeyaan nidaamka caddaaladda Soomaaliya iyada oo ujeeddadu tahay abuuritaanka laan garsoor oo karti leh, isku xiran oo madax-bannaan, iyada oo la qaadayo tallaabooyinka soo socda:

Midda koowaad, Waa in dib loo soo celiyo heshiiskii Jowhar, heshiiskaas ayaa kamid ahaa isku dayada lagu raadinayo in heshiis siyaasadeed oo la wada ogolyahay laga gaaro nidaamka caddaaladda dalka ee ay isku raacsan yihiin dowladda dhexe iyo dawlad-goboleeedyadu, taas ayaanu dalku u baahan yahay. Nidaamka isku dhafka ah ee caddaaladda ee la soo jeediyay waa tallaabo waxqabad horseedi karta oo dalka dani ugu jirto, marka loo eego dhaqaale yaraanta iyo taagta karaanka bulshada. Waxa aannu ugu baaqeynaa madaxda xilka qaban doonta ee dowladda federaalka iyo dawlad-goboleedyada in ay dib u eegis ku sameeyaan heshiiskaas oo ay codsiyo soo jeedin, una gudbiyaan Guddida madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka iyo guddida dib u eegista dastuurka, waa haddii ay sii ambaqaadaan tallaabadaas, waxa aanay ka dhigan tahay in ay hoggaamiyeyaashu xal u heleen mid kamid ah qodobadii dastuurka ee jahwareerka badan dhaliyay.

> *Midda koowaad, Waa in dib loo soo celiyo heshiiskii Jowhar, heshiiskaas ayaa kamid ahaa isku dayada lagu raadinayo in heshiis siyaasadeed oo la wada ogolyahay*

Ta labaad, iyada oo loo filayo in talaabadii ugu horaysay la qaaday, wasaaradda caddaaladda federaalka ee soo socota, oo kaashaneysa wasaaradaha caddaaladda dawlad-goboleedyada, waa in ay soo diyaariyaan sharci abaabulaya nidaamka maxakamadaha qaranka, isla markaana waa in ay u beddelaan nidaam maxakamadeed oo isku dhafan.

---

107 Wareysi lala yeeshay wasiirka cadaaladda ee dowladda federaalka, ibid

Xeerka garsoorka federaalka waa mid muhiim u ah casriyeynta dhammaan laamaha garsoorka, xukuumadda xilka la wareegi doontaa waa in ay si degdeg ah ku meelmarisaa hindise sharciyeedka, intaa kadib, waa in uu baarlamaanku ansixiyaa sharciga lamid ah kii an hore us oo sheegnay si loo waafajiyo nidaamka cusub ee uu yeelanayo garsoorka dalku.

> *Arrinta saddexaad, Madaxweyne Farmaajo waa in aanu saxeexin hindise sharciyeedka ku saabsan xubnaha kamid noqonaya golaha adeegga garsoorka*

Arrinta saddexaad, Madaxweyne Farmaajo waa in aanu saxeexin hindise sharciyeedka ku saabsan xubnaha kamid noqonaya golaha adeegga garsoorka, hindise sharciyeedkaas oo ay 17-kii bishii Nofembar 2020, ay meel mariyeen baarlamaanku, waxaana loo sababeeyay qodobadan soo socda, (a) Waxa hore xubnahan u taageeray golaha wasiirada ee dowladdan uu xilkeedu sii dhammaanayo, taas oo aan haysan awood sharci oo ay ku dhisaan hay'ad caynkan oo kale ah, (b) Su'aalo badan ayaa ka dhashay xilliga las oo magacaabay guddidan, gaar ahaan danta laga leeyahay, oo u muuqata in la qaadayo tallaabo degdeg loo soo abaabulay xilli muddo yari ka harsantahay doorashada qaranka, (c) marka loo eego dabeecadaha is burinaya ee dastuurka, waxa muuqata in magacaabista golaha adeegga garsoorka loo maray qaab aa sax ahayn, kaas oo waxyeelaynaya kalsoonida ay ku qabaan arrintan dhammaanba dadka ay khuseysa.

Afraad, iyada oo lagu shaqeynayo go'aannadii ka soo baxay Heshiiskii Jawhar, waa in ay dawlada faderaalka iyo dawlad-goboleedyadu la yimaaddaan hannaan hufan oo lagu soo xulayo,laguna qiimaynayo si loo soo magacaabo loona ansixiyo xubnaha cusub ee golaha adeegga garsoorka, iyo sida oo kale xubnaha maxakamadda dastuurka iyo guddida xuquuqal insaanka. Saddexdan hay'adood waa xudunta dastuurka, midkoodna gaar looma dhisi karo. Sidaa awgeed, golaha adeeegga garsoorku waa udub dhexaadkooda, sida oo kale maxkamadda dastuuriga ah, madax-bannaanida laanta garsoorka, iyo waliba aragti hudan oo lagu hoggaamiyo geeddi-socodka siyaasadeed ayaa keeni kara xal nabadeed. Haddii lagu guuldarraysto arrintaas, waxa ay sii wiiqeysaa nidaamka caddaaladda ee dalka, hay'ad kasta oo kaligeed gaar loo dhisaana waxa ay luminaysaa kalsoonida iyo sharci ahaanta ay dadka Soomaaliyeed ka dhex arkayaan.

> *Waa in ay Golaha Shacabka miisaaniyad u abuuraan ha'yadaha garsoorka, si ay madax-bannaani uga qaataan laanta fullinta*

Shanaad, mar haddii la samaynayo Golaha cusub ee adeegga garsoorka iyo xubnaha ka tirsan maxkamadda dastuuriga ah, waa in ay Golaha Shacabka miisaaniyad u abuuraan ha'yadaha garsoorka, si ay madax-bannaani uga qaataan laanta fullinta. Dowladda federaalku waa in ay shanta sano ee soo socota ugu yaraan boqolkiiba 10 sare u qaaddaa miisaaniyadda loogu talagalay laanta garsoorka, sannad walbana waa in kor loogu sii qaadaa miisaaniyadda laanta garsoorka. Golaha cusub ee adeegga garsoorku, waa in ay dib u eegis ku samaysaa baraamijka magdhawga ah ee loogu talagalay saraakiisha garsoorka si loo xaqiijiyo in mushahar fiicaan la siiyo. Golaha adeegga garsoorka waa in ay shaqaaleysiiyaan oo ay tabbabar u fidiyaan shaqaalaha garsoorka isla markaana waa in ay qiimeyn ku sameeyaan guud ahaan nidaamka garsoorka si loola xisaabtamo saraakiisha lagu helo musuqmaasuqa. Isla xisaabtan la'aanta ka dhex jirta laamaha garsoorka oo kali ahi, dhibaato umay horseedin dalka, balse waxa ay horseedday in qaar kamid muwaadiniintu ay caddaalad ka raadsadaan maxakamadaha Al-Shabaab.

Ugu dambeyntii, waxaa loo baahan yahay dowlad federaal oo awood u leh maamulka dalka, si loo fuliyo go'aanaada ka soo baxa maxkamadaha, waa in la helaa bilays federaal ah oo leh awood ay dalka ku maamulaan, kuwaas oo lagu soo dhisay nidaam sharci ah, waana in loo maraa xeerarka caddaaladda ee federaalka, bilayska federaalku waa in ay ilaaliyaan amniga saraakiisha garsoorka, sida oo kale waa in ay yihiin kuwo u qalabeysan baaritaannada lagu sameeyo teknooloojiyadda iyo qaanuunka maxakamadeynta.

HERITAGE INSTITUTE